# Waxaanu ka maqalay qoysaskii dhibtu soo gaadhay, dadkii ka badbaaday iyo kuwii goobjoogga ahaa

[SOMALI]



ROYAL COMMISSION OF INQUIRY INTO THE TERRORIST ATTACK ON CHRISTCHURCH MOSQUES ON 15 MARCH 2019

TE KŌMIHANA UIUI A TE WHAKAEKE KAIWHAKATUMA I NGĀ WHARE KŌRANA O ŌTAUTAHI I TE 15 O POUTŪ-TE-RANGI 2019

26 November 2020

*Waxaanu ka maqalay qosaskii dhibtu soo gaadhay, dadkii ka badbaaday iyo kuwii goobjoogga ahaa*

*Waxaa la daabacay: 26 November 2020*


*ISBN 978-0-473-54879-7 (PDF)*

*ISBN 978-0-473-55300-5 (Paperback)*

*© Copyright 2020*

*Warqaddan rasmiga ah waxa laga helayaa halkan: www.christchurchattack.royalcommission.nz*

*Warqad la hubiyay aan lahay Acid lana baabiin Karin.*



Halkani waa gurigaagii
Waxaanay ahayd inaad nabadgelyo
ku haysato halkan

*Odhaahdan waxaa si naxariis leh ugu deeqay farshaxan Ruby Jones.*
*Gudida Boqortooyada waxay si qoto dheer u ammaanaysaa hibadiisa iyo naxariistiisa Ruby.*

# Hordhac ka yimi Gudoomiyeyaasha



*Salaamu Caleykum iyo tēnā Koutou*

Waxaanu ku bilaabaynaa anagoo u muujinayna tiiraanyo mug leh qoysaskii 51kii shahiid, iyo dadkii ka badbaaday iyo kuwii goobjoogga u ahaa falkii argagixisada ahaa iyo qosaskoodiiba. Intii aanu wadnay baadhitaanka waxaa ahaydeen xuddunta waxaanu maskaxda ku hayno. Waanu garanaynay arrintan muhimadeeda ilaa bilawgiiba, laakiin fahamkayaga iyo tixgelintayadu micnaha ay runtii ku fadhido arrintani waxay sii kortay markaanu dheysanay sheekooyinkiinii, wixii aad la kulanteen iyo caddaymihii aad bixiseen. Waxaa naga siiseen fikrad xaqiiqadii baqdinta badnayd ee uu lahaa weerarkii argagixisada iyo saamaynta weli socota ee ay idinku reebtay. Waxyaabihii aad soo wada marteen waxay nagu riixday inaanu raadino jawaabihii haboonaa, si aanu u hubino inaanu meelwalba isha farta ka soo gelino oo idin siino damaanad inay hey'adda amaanka ee New Zealand tahay mid ku filan shaqadeeda. Mahadnaq qalbiga ka soo go'ay ayaanu idiin celinaynaa inaa nala kulanteen oo qalbigiina iyo guryihiinaba noo furteen si aad noola qaybsataan sheekada wixii idin soo maray.

Dhegeysigii dadkii uu saamaynta ugu badan ku yeeshay weerarkii argagixisada ahaa waxay wax tuseen khadadkayagii baadhitaanka waxaanay siiyeen xaqiiqooyin aad u badan oo ka caawiyay inay ka soo kabtaan weerarkaa baqdinta lahaa. Arrintani aad ayay dareenkayaga u dhaqaajisay waxaanaanu rumasanahay inay qiimo weyn ku kordhisay warbixintayada.

Waxaanu kaloo u garaabaynaa kuwa, sikastaba ha u dhacdee, aan karikarin ama aanay u suurto gelin inay nala wadaagaan wixii soo maray, si kastaba ha ahaatee, hadii ay u arkeen inaanay waqtiga iyo duruuftu haboonayn ama ay sababo kale jireen. Waxaanu ognahay inay dad badan oo jeclaa inay nala kulmaan waayeen waqtigii, meeshii iyo suurto galkii ay nagula hadlilahaayee. Waanu aqoonsanahay inay sheekooyinka, khibradda iyo cadaynta halkan ku qorani aanay metelayn qoysaskii 51kii shahiid, kuwii ka badbaaday iyo kuwii goobjoogga u ahaa weerarkii argagixisada ahaa. Waxaanu ku soo dhaweynaynaa akhristayaasha inay furaan bogagan oo ay ka falceliyaan xogahan aanu fursadda u helay inaanu ka soo ururino kuwii uu weerarkii argagisada ahaa sida mugga leh u saameeyay.

**Hon Sir William Young KNZM**
Chair

**Jacqui Caine**
Member

# Waxyaabaha ku jira


| | | |
|---|---|---|
| **Qaamuus** | Macnaha ereyada | 4 |
| **Qaybta 1** | Qormada | 6 |
| | Gudida Boqortooyada ee xog baadhista Weerarkii Argagixisada ee Masgidyada Christchurch 15kii March 2019kii | 6 |
| | Xuduudda baadhista | 7 |
| | Waqtiga baadhista loo qiyaasay | 7 |
| | Warqaddan rasmiga ah (document) ujeedadeeda iyo Hawshayada | 8 |
| | Waxaanu wediinay qoysaskii, badbaadayaashii iyo goobjooyaashii | 12 |
| **Qaybta 2** | Saamayntii weerarkii argagixisada ahaa | 14 |
| | Saamayntii tooska ahayd ee weerarkii argagixisada ahaa | 14 |
| | Saamaynaha heerka Labaad | 16 |
| | Taakulo ka timi ururada New Zealand inteeda kale | 17 |
| | In laga helo taageerada haboon hey'adaha Bulshada qaybaheeda way adagtahay | 17 |
| **Qaybta 3** | Nolosha Muslimka ee New Zealand | 27 |
| | Caamahaan si togan ayaa loo arkaa New Zealand, laakiin waxaa jira takoor, cunsuriyad iyo cuqdad islaamka laga qabo oo baahsan | 27 |
| | Saamaynta eexda (hala ogaado ama yaan la ogaanne) gaarahaan xagga warbaahinta | 29 |
| **Qaybta 4** | Su'aalihii layska weydiiyay qofka iyo waxay hey'adaha Bulshada ka yaqaaneen qofkii gaystay argagixisada | 33 |
| **Qaybta 5** | Xalalka ay soo jeediyeen qoysaska ay saamaysay dhibtu | 35 |
| | Masjidka ammaankiisa oo la kordhiyo | 35 |
| | In la qaato xuquuqda aadamaha, kala duwanaata bulsha iyo yaraynta saamaynta xagjirka dhibaatada leh | 36 |
| | In haruumarin lagu sameeyo Nidaamka Ammaanka Qaranka New Zealand | 38 |
| **Qaybta 6** | Arrimo kale oo ay soo qaadeen qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaash, iyo goobjoogeyaasha | 41 |
| | Siday uga jawaabeen weerarkii argagixisada ahaa Booliiska New Zealand | 41 |
| | Dhexgakii 'Qofka' ee Nidaamka Caddaaladda Dembiyada | 42 |
| **Lifaaq** | Shaqda loo diyaaryay warqadan rasmiga ah (document) | 43 |

## Macnaha ereyada

| Erey | Macnaha |
| --- | --- |
| **Hijab** | Xijaab |
| **intelligence and security agencies** | Xafiiska Xidhiidhka Ammaanka Dawladda iyo Adeegga Sirdoonka Ammanka New Zealand. Waa erey sharci ku salaysanoo oo hoos yimaadda Sharcigii Sirdoonka iyo Ammaanka ee 2017kii. |
| **Masajid** | Masaajido |
| **Masjid** | Masaajid |
| **Masjid an-Nur** | Masjidka al-Nuur |
| **masjidain** | Laba masaajid |
| **shuhada** | Shahiiddo ama Naftood ureyaal. |
| **wider New Zealand Intelligence Community** | Kooxda hey'daha qaybaha Bulshada ee soo ururiya, qiimeeya ama sir sirdoon u adeegsada, iyo hey'adaha soo ururiya iyo/ama isticmaala siro dhawrsan oo loogu talagalay siysada debedda ama ta gudaha iyo hawlgalada. Waxa ku jira Bulshada Sirdooka New Zealand (Kooxda Ammaanka Qaranka ee ka mida Waaxda Ra'iialwasaaraha iyo Baarlamaanka, Xafiiska Xidhiidhka Ammaanka Dawladda iyo Adeegga Sirdoonka Ammaanka New Zealand) iyo hey'adaha qaybaa Bulshada sida Waaxda Saxidda, Socdaalka New Zealand, Wasaaradda Aasaasiga ah, Adeega Kastamka New Zealand, Xoogga Difaaca New Zealand iyo Booliiska New Zealand. |
| **whānau** | Qoys (afka Maori-ga) |



# Qaybta 1: Qormada

1 15kii March 2019, Masaajidka al-Nur iyo Xarunta islaamka Linwood ee ku yaal Christchurch waxaa weeraray xagjire (right-wing) argagixiso ah iyadoo dadkii tukanaayay salaadda ku jiraan. 51 qof ayaa la dilay 40 kalena rasaas ayaa lagu dhaawacay.

2 Dawladdu waxay kaga jawaabtay weerarkaa argagixisada ah waxaa kamid ahaa laba ogaysiis oo muhiim ah:

a) Ogaysiiskii 21kii March 2019kii ee lagu mamnuucy qorayaha darandooriga u dhaca iyo kuwa dagaalka iyo magasiinka rasaasta badan qaadda waa la mamnuucayaa markiiba. Waxana la hirgelinayay hab dib loogu iibsanayo.

b) 25kii March 2019kii waxaa la soo saaray ogaysiis ah in la samaynaayo Guddida Boqortooyada ee Xog Baadhaka si ay u dabagalaan dhacdooyinkii ka horeeyay ee keenay weerarkii argagixisada ahaa.

3 26kii March 2019, nin Australiya u dhashay ayaa qirtay dika 51 qof, 40 jeer oo iskuday dil iyo hal dacwo oo ah fal weerar argagixiso. 27 August 2020, waxaa lagu xukumay madaxaa haku furto aan saamaxaad lahayn. 1dii September 2020, Ra'is al-Wasaaraha New Zealand waxay ninkaa u aqoonsatay inuu yahay argagixiso jira marka la eego qaybta 22aad ee Xeerka Cadaadinta Argagixisada ee soo baxay 2002dii. Aqoonsiga caynkaas ahi marka la eego Sharciga New Zealand, waxa uu xidhayaa hantida xubin ka mid ah argagixiso waxaanuu ka dhigayaa fal dembiyeed isaga iyo cidkastoo kale oo ka qaybqaadata ama taageerta falalka cid argagixiso loo aqoonsaday.Waxaanu garanay in aanaan qofka argagixisada ah warqaddan rasmiga ah (this document) ku magacaabin oo aanu sidaa beddelkeeda ugu yeedhno "qofkii".

## Gudida Boqortooyada ee xog baadhista Weerarkii Argagixisada ahaa ee Masjidyada Christchurch 15kii March 2019

4 Gudida Boqortooyada (The Royal Commission) ee Xog baadhista Weerarkii Argagixisada ahaa ee Masjidyada Christchurch 15kii March 2019kii waxaa loo sameeyay inay baadhaan qofkaa dhaqdhaqaaqiisii ka hor 15kii March 2019kii iyo inay u fiirsadaan:

a) Maxay Hey'adaha Bulshada ka yiqiineen qofka, 15kii March 2019kii ka hor;

b) Maxay hey'adaha bulshada ka qabteen (haday jirto) waxaa ay ogaayeen;

c) Hadii ay jireen wax kale oo ay Hey'adaha Bulshadu qaban kari lahaayeen si ay uga hortagaan weerarka argagixisada ah;

d) Maxay kale oo Hey'adaha Bulashadu tahay inay qabtaan si looga hotago weerar argagixiso waqtiga soo socda;

5 Hey'adda Boqortooyad waa inay wax ka soo saaraan:

a) Hadii hey'adaha Bulshada ay ogaayeen war uga digikarayay weerarka argagixisada ah iyo inkale;

b) Siday hey'adadha Bulshada u wada shaqeeyeen warkana u wadaageen;

c) Hadii Hey'adaha Bulshadu ugu dhaceen inay odorosaan weerarka waayo waxaan haboonayn foojignaanta kaydka kahortagga argagixisada;

d) Inay Hey'adaha Bulshada ay ku dhaceen inay heerkii laga rabay ama si uun wax uga qaldanaayeen; iyo

e) Wax kastoo kale oo loo baahanyahay oo laguna helikaro warbixin dhan.

6 Gudida Boqortooyada waa inay ka talo bixiyaan arrimahan:

a) Waamaxay haruumarka lagu samaynkaro Heyadaha Bulshada ee madaxa banaan sida ay usoo ururiyaan, isugu gudbiyaan iyo sida ay u falanqeeyaan wararka;

b) Sidee ay heyadaha Bulshada ee madaxa banaani ama dhaqamada hawlgalka ah kor loogu qaadi lahaa si looga hortago waqtiga soo socda weerarada argagixisada ah; iyo

c) Waxkasta oo kale si warbixin dhan loo bixiyo.

7 Talobixinahan waxaa ka mid noqonkara in wax laga bedelo xeerarka (aanu ku jirin sharciga hubka), siyaasadda, shuruucda, iyo waxa joogtada ah ama dhaqamada.

## Xuduudda baadhista

8 Gudida Boqortooyada looma ogola inay wax ka wediiyaan:

a) Inuu qabo ama aanu qabin qofna hadii lagu, ama laga yaabo, in lagu soo oogay dembi ku saabsan weerarka argagixisada ah;

b) In wax ka bedelo xeerka hubka;

c) Dhaqdhaqaaq ururo ka baxsan qaybaha Bulshada, sida ka hadalka saaxadda warbaahinta; iyo

d) Sida ay hey'adaha Bulshadu ugu jawaabeen weerarka argagixisada kadib markii uu bilaabamay.

## Waqtiga baadhista loo qiyaasay

9 Gudida Boqortooyada waxay bilaabeen 10kii April 2019kii waxaanay bilaabeen inay cadayn helaan 13kii May 2019kii. Baadhistayadu waxay lahayd dhawr weji oo isku soo noqnoqonaaya laga bilaabo markaanu samaysanay ilaa markaanu la shaqo galnay bulshada, waxaanu bilawnay baadhis iyo xog ururin, markii aanu qabanay warasiyo cadayn ururis ah, aanu galay falanqayn iyo gorgortan iyo habayntii iyo soo bandhigiddii warbixinta.

10 Maalintii ay ahayd in warbixinta la keeno oo ahayd 10kii December 2019 waxaa la kordhiyay laba goor ilaa ay kama dambaystu noqotay 26kii November 2019kii. Kordhintu waxay u noqotay lagamamaarmaan sababta oo ah:

a) Mug weynaanta waxii aanu qiimaynaynay; iyo

b) Khalkhalkii uu keenay cudurka COVID -19 ee fiday.

11 Waxaanu u geynay warbixintayadii Gudoomiyaha Guud, Dame Patsy Reddy. Gudoomiyaha Guud wuxuu warbixintii u geeyay Dawladda si ay uga fiirsadaan.

## Warqaddan rasmiga ah (document) ujeedadeeda iyo Hawshayada

12 Qayb muhiim ah oo shaqada Gudida Boqortooyada ayaa ahayd inay la shaqeeyaan qoysaska 51kii shahiday  (kuwii ku dhintay kuna shahiiday falkii argagixida ahaa darteed), kuwii ka badbaaday iyo goobjoogayaashii weerarkii argagixisada ahaa iyo qoysaskooda. Waxay ahaayeen xudunta baadhistayada iyo fekerkayaga. Gudidan Boqortooyada ee baadhaysay arrinkan waxaa loo sameeyay masiibadii dhacday 15kii March 2019kii taas oo sababtay tiiranyo weyn, dhaawac iyo nafo la waayay.

13 Dadkan dhamaantood waxaa lagu tilmaamikaraa dhibanayaal, taas oo qaarkood muujinaysa waxyeeladii ay soo mareen. Hase yeeshee qaarbaan jeclayn ereyga dhibane. Badbaade qudhiisa aragti kala duwan ayaa laga haystaa. Kuwii ay waxyeeladu saamaysay qaarbaan jeclayn in la calaamadiyo. Document-kan isticmaalay tilmaamaha “qoysaska waxyeeladu gaadhay, badbaadayaasha iyo goobjoogeyaasha” si aanu u tilmaano qosaskii 51kii shahiid, kuwii ka badbaaday iyo kuwii goobjoogga ahaa dhacdadii weerarkii argagixisada ahaa iyo qoysaskoodii.

14 Document-kani waxa ugu horeeya ee ay abbaaraysaa waa inaanu si dhammaystiran u diiwaan gelino wixii aanu ka maqalay qoysaskii waxyeeladu gaadhay, kuwii badbaadahy iyo kuwii goobjoogga ahaa. Marka la eego baaxadda wixii aanu maqalay, waxaanu u aragnay inay muhiim tahay in la garwaaqsado sheekooyinka iyo cadaymaha ay sheegeen dadkuu aad wax u yeelay falkii argagixisada ahaa.

15 Waxaanu rabnay inaanu mudnaanta kowaad siino inaanu la kulano qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii haday rabeen inay nala kulmaan. Waxaanu la kulanay ooriyo, rag xaas leh, hooyooyin, aabayaal, walaalo rag ah, walaalo hablo ah, wiilal gabdho, edooyin ama habaryaro,adeerro ama abtiyo, ilma adeer/abti ay lahaayeen shahiidadii. Sidoo kale, waanu la kulannay kuwii dhaawacmay (jidh iyo maskaxba), badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii weerarkii argagixisada ahaa iyo qoysaskoodii.

16 Markii aanu bilawnay hawshayada maanaan haysan meel ay ku qoranyihiin qoysaskii wax noqday, badbaadeyaashii,iyo goobjoogeyaashii. Hey’ada bulshada ay khusayso iyo ururada

bulshadu may karayn inay nala wadaagaan magacyadii iyo meel ay nagala soo xidhiidhan (Xirriran) si ay war noo siiyaan arrin khusuusi ah darteed (privacy). Si aanu isugu dayno inaanu gaadhno inta ugu badan ee qoysaskii dadkii waxyeeloobay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii ee suurtogelaysa, waxaanu toos ugu yeedhnay kuwii weerarku aad u waxyeeleeyay si ay noogula kulmaan habka ay doonayaan.

17 Waxaanu u sheegnay Imamada xaafadda inay usheegaan dadka inay nala kulmikaraan haday doonayaan. Si aanu u hubino inuu dalabkayagu (baaqayagu) gaadhay dadka ugu badan waxaa kale oo aanu gaadhsiinay warka kooxo/ururo kale inay ogaysiiyaan cidkasta inay jirto fursaddaa ay nagula kulmayaan, waxaa ka mida 'Christchurch Muslim Liaison Group' (Kooxda Xidhiidhka Muslimka), Muslim Community Reference Group (Kooxda Tixraaca ee Bulshada Muslimka) xubno ka mid ah Taageerayaasha Dhibanayaasha (Victim Support), iyo Wasaaradda Horumarinta Bulshada (Ministry of Social Development). Baaqan waxaanu ku baahinay barahayaga bulshada oo ka baxa warbaahinta, dadka aanu la kulano, Khadka telifoonka (0800-line) waxaanu geynay Masaajdada nuqullo aanu ku casuumayno dadka oo aanu ku dhejinay Boodhadhka masaajidada (Masjid Notice boards).

18 Waxaa kale oo na caawiyay qareenada bulshada (Just Community), iyo adeegyada la taliya Bulshada sida 'Navigate Your Way Trust' kuwaasoo naga caawiyay in aanu la kulanno qoysaskii dhibtu soo gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii iyagoo ahaa kooxo yar iyo kuwo badanba. Taageerada ay ururadaasi na siiyeen waxay noo suurto gelisay inaanu dhegeysano dad aanaan la'aantood gaadhneen. Mahadnaq badan ayaanu ugu haynaa taageerada iyo caawimada ay na siiyeen.

19 Dadka waxaanu ula kulmaynay qaabka ay rabaan iyo meeshii suurto gal ahba, iyo meelo iyaga u haboon. Dadka qaarbaa guryahooda nagu qaabilay, qaarna waxaa u sahlanayd inay nagula kulmaan xarunta bulshada, makhaayadda xaafadda, ama qolalka shirka ee hudheelada ama library-ga. Shirarkaas oo dhan waxa loo qabtay si gaar ah, waxaanaanu tixgelinay inaanu ixtiraam gaar ah siino hidaha iyo diinta ku dhaqankeeda oo aanu maskaxda ku hayno waxyeelada iyo qarracanka dad badan ku dhacay.

20 Qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii aanu la kulanay waxay ka kala yimaadeen in ka badan 22 wadan oo kala duwan waxaanay ku hadlaan in kabadan 50 af oo kala duwan. Arrimahaas oo dhan waa in la tixgeliyo marka dadkaa loo tegaayo.

21 Qaar ka mida qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii waxay ahaayeen diyaar oo waxay doonayeen inay nala kulmaan marwalba. Qaarkoodna waqti dheeraad ah ayay u baahnaayeen. Waxaanu rabnay inaanu ixtiraamno qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha tacsida u fadhiya. Waxaanu doonaynay inaanu si saxa u ilaalino maalmaha mudan ee Muslimka iyo dhaqankooda, iyo waqtiga caadada, Ramadaanta, Ciidda fitriga, Ciidda Duxada, Xajka iyo Muxarram.

22 Intii aanu hawsha ku jirnay waxbaanu baranaynay markasta sidii saxda ahayd wax umaanaan qabanayn. Waanu qaderinaynay markaanu helno jawaab celin marka wax shaqaynwaayaan, sida anagoon wadan turjumaan taa soo qofka u suurtogelinlahayd inuu si hawlyar noola qabsado, ama marar sida qolka loo habeeyay ay tusasay awoodda aan isu dheeli tirrayn. Jawaab celintan oo kale ayaa naga caawisay inaanu la qabsano habka aanu ula xidhiidhayno si aanu u hubino inay dadku dareemaan deganaansho inay noola qabsadaan, iyo inay meel amaan ah joogaan oo codkooda la maqlaayo. Waxaanu filaynaa in ujeedadayada oo ahayd inaanu si haboon oo ammaan ah arrinta ugalno ay cadayd, xitaa marka aanaan sax ahayn.

23 Waxaa jiray dhawr wax oo aanu rabnay inaanu hello markaanu la kulmaynay dadkan sida qotada dheer uu usaameeyay weerarkii argagixisada ahaa ee 15kii March 2019kii. Waxaanu doonaynay inay dadku helaan fursad aanu kula qaybsano sheekooyinkooda, cadayntooda, iyagoo afkooda ka sheegaya. Waxaanu doonaynay inaanu aragtidooda maqallo iyo waxkasta oo dhacay ka hor weerarkii argagixisada ahaa iyo/ama fekrado ay ku taageerayaan xog baadhistayada iyo sida Heyadaha qaybaha Bulshahu ay uga hortegilahaayeen inaanu weerarkan oo kale markale dhicin.

24 Anaga arrinta noogu muhiimsanayd aanu idiinku nimid waxay ahayd inaanu idin dhegaysano. Qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha ayaa hogaaminaayay kulamada. Dadku waxay wadaageen sheekooyin ku saabsan dadkoodii ay jeclaayeen ee ay waayeen, ama iyaga wixii ka soo maray weerarkii argagixisada ahaa. Waxay warsadeen waxay yihiin Gudida Boqortooyada, sida ay u shaqeeyaan, iyo awoodda ay bleeyihiin si ay isbedel usameeyaan. Dadka qaarkood waxay ka digtoonaayeen inay eedeeyaan, Booliiska New Zealand, ama Heyadaha qaybaha Bulshada, iyadoo taa qayb ka qaadanaysay wixii ay kasoo mareen madaxda dawlado kale, iyo iyagoo ka werwersanaa inay dhaleecayn kastaa u horseedi karto natiijo taban iyaga. Qaarkood waxay dareensanaayeen inaanay helayn taageeradii ay uga baahnaayeen hey'adaha qaybaha Bulshada, markaa anaga caawimo naga soo raadsanayeen, tusaale ahaan si ay shaqo uhelaan ama si ay u keenaan New Zealand dad qoyskooda ah si ay u taageeraan. Inaanu dadka ka caawino caqabadahan way ka baxsanayd wixii lanoo edmaday, laakiin hadii ay suurtogal tahay oo haboontahay waxaanu u gudbinaynay dadkaa hey'adaha qaybaha Bulshada ay khusayso iyo ururada laga yaabo inay ka caawin karaan arrimahan.

25 Waxyaabihii aanu maqalay markii aanu kulamada ku jirnay qaarkood wey ka baxsanaayeen Shuruudaha aanu wax ku Gudbin karno. Hase ahaatee Shuruudahayaga Gudbinta waxay kaloo ubaahanyihiin inaanu siino waxay kusoo hirtaan Bulshada New Zealand. Markaa waxaanu ka fekernay inay muhiim tahay in la diiwaangeliyo baaxadda arrimaha muhiimka u ahaa qoysaska dhibtu heshay, badbaadeyaasha goobjoogeyaasha aanu la kulanay. Document-kani waxay soo saartay tahan khibrado ah oo lasoo koobay iyo arrimo wata xalal suurtogal ah oo ay soo jeediyeen qoysaski dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goojoogeyaashii nala hawlgalay.

26 Kulamadii aanu la yeelanay qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii gaar ayay ahaayeen. Taa macnaheedu waa wixii aanu gorfaynay waxay ahaayeen qarsoodi udhexeeya dadkii aanu ba kulanay iyo Gudida Boqortooyada. Waxaau maqalay mahadnaqyo niyad ah, ammaan iyo qaderin taageerada la tusay qoysaskaa dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii. Laakiin waxa kale oo aanu dareenay tiiraanyada,werwerka iyo cidhiidhiga mugga leh ay ku jireen. Waxaanu kusoo bandhignay sheekooyinkan iyo khibradahan annagoo ujeedna inaanu siino ixtiraamka ay u qalmaan. Si caam ah ayaanu usamaynay taa, in ka badan inta aanaan soo qaadan dad gaar ah. Si aanu u ilaaliyo dadka arrimahooda gaarka ah, lama magacdhebayn cidda la sheegayo. Marka wax lasoo xiganaayo, guudahaan waxay ka imanayeen waxyaabo ay soo gudbiyeen cid uhadlasa koox badan oo ka mida qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii, waxaanay metelaysay khibrado iyo aragtiyo kala duwan. Sikastaba ha noqotee waxaanu aqoonsanahay inaany waxyaabahaa ay soo xigteen metelikarayn dhammaan qoysaskii ay dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii.

27 Waanu qiraynaa furfurnaanta iyo heelanaanta qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii ay noola hadleen gaarahaan waqti ay tacsi ku jireen. Wadahadaladan iyo waxyaabahan lasoo gudbiyay waxay si weyn u xoojiyeen hawshayadii anagoo hubinay inay xuddunta shaqadayadu noqoto 51kii shahiid, taasina waxay qiimo dheeraada uyeeshay warbixintayadii.

28 Waxaanu halkan kusoo bandhignay, iyadoo ay weheliyaan war aanu kasoo qaadanay kulamadii, waraysiyadii iyo cilmi baadhistii, si aanu usoo saarno warbixintii Gudida Boqortooyada ee weerarkii argagixisada ahaa ee lagu qaaday Masjidka al-Nur iyo Xarunta Islaamka Linwood 15kii March 2019kii.

## Waxaanu wadiinay qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii

29 Umaanu qorin su'aalaha qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii, waxaanu se siinay fursad inay wadaagaan sheekooyin iyo cadayn ay iyagu ereyadooda ku sheegayeen waqtiga ay iyagu doonayeen. Waxaaanu su'aalaha uwediinay si hadalku noogu furmo, hadii loo baahdo. Su'aalaha waxaa loogu habeeyay qof walba xaaladdiisa, waxaana su'aalaha ka mid ahaa:

- Saamaynta uu ku yeesha weerarkii argagixisada ahaa iyaga, qoyskooda iyo asxaabtooda;
- Noloshooda wadanka New Zealand weerarkii argagixisada ahaa ka hor;
  - i) Siday ahayd caamahaan nolosha New Zealand ay kasoo mareen; iyo
  - ii) Inay weligood dareemeen ammaan darro ka hor 15ki March 2019kii, iyo inay caawimo dalbadeen ama walaac ka hadleen;
- Waxay dawladu mar hore qabakaraysay si ay uga caawiso inay dareemaan nabadgelyo; iyo
- Waxay dawladu qabankarto (hagaajin karto) waqtiga soo socda si ay New Zealand uga dhigto meel amman u ah qof kasta oo looga hortago waqtiga soo socda weerarada argagixisada ah.



# Qaybta 2: Saamayntii weerarkii argagixisada ahaa

## Saamayntii tooska ahayd ee weerarkii argagixisada ahaa

1 Qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii ay ka dinteen ehelkoodii ay jeclaayeen waxay noo sheegeen sida uu weerarkii argagixisada ahaa u saameeyay iyaga. Badbaadeyaashii ay dhaawacyadu ka soo gaadheen weerarkii argagixisada ahaa ay ku jiraan kuwii iyagoo baxsanaaya dhaawcmay, waxay noo sheegeen inay marwalba gaabis tahay soo kabashadu. Qaarkood dhaawacyo culus baa gaadhay, maskaxahaan iyo jidhahaanba, taasi intay noolyiin ayay saamaynaysaa.

2 Dad qalliin badan lagu sameeyay ayaanu warkooda dhegeysanay oon weli bogsan. Badbaadeyaasha qaarkood ayaan gacmahooda iyo lugahooda weligood dib u isticmaalayn. Dadku waxay la noolyihiin xanuun joogto ah iyo dareen la'aan ay keeneen falliidhadii rasaasta oo jidhkooda ku jira. Badbaadeyasha qaarkood ayaa ubaahan in waqti walba la hayo iyo qalab sigaara loogu sameeyo gurigooda si ay dhaawcyada dartoo nolosha uga caawiyaan.

> *Maalintaa waxaa layga toogtay lugta midigta xaggeeda sare falliidhkuna waxa uu socday ilaa beerka, waxaanuu keenay dhaawc dheeraada welina wuu igu jiraa. Intii dhaweyd waxaan caloosha ka dareemaa xanuun .... Dhakhtarka qalidda ayaa ii sheegay inuu falliidhkii halksii hore ka dhaqaaqay, weliba xagga muruqa udhaqaaqay. Way iisheegayaan haduu xagga calooshaa u dhaqaaqo, waanay ka fiirsandoonaan inay soo saaraan, laakiin heerka uu hadda marayo wuu igu jirikaraa.*

3 Badbaadeyaasha intooda badani shaqadii kuma noqonkaraan markiiba, qaarna way bedeleen xirfadoodii dhaawacyada dartood. Inkastoo Badbaadeyaal badani ay sheegeen in ciddii ay u shaqaynayeen aad utaakuleeyeen, siiyeenna waqti dheer si ay usoo bogsadaan, dadka qaarbaa shaqadoodii waayay waayo hawshii ay qabanjireen ma fulinkaraan hadda. Badbaadeyaasha inyar oo ka mida ayaa ganacsigoodii waayay.

4 Waxay noo sheegeen dadkii dhibtu gaadhay saamaynta ay ku lahayd saacadihii iyo maalmihii toos uga dambeeyay weerarkii argagixisada ahaa. Waxaa lanoo sheegay caqabadii dadka ka qabsaday baadigoobka ehelkoodii ay jeclaayeen.

> *Qof ay waalidkay isyaqaaneen ayaa sheegay inay walaalkay ku arkeen qolka qaliinka.. Aabo iyo hooyo ayaa cisbitaalkii ku cararay markaasay iygoo ku sugaayay Masaajidka Al-Nur afar saacadood ayay u dhaqaaqeen xagga Cisbitaalka Christchurch halkaas oo ay lix saacadood oo kale sugaayeen. Intaas oo dhan ka dib waxay ogaadeen inaanu qofka ay intaas oo dhan sugaayeen, buke lambar 13, ahayn walaalkay. Ugu dambaystii waxaa loo sheega in lala'yahay walaalkay.*

5 Qoysas badan oo dhibtu ku dhacday, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii oo aanu la kulanay ayaa dareensanaa inay labada xaaladood ee aqoonsiga dhibanaha iyo aqoonsiga

dadka lagu daaweynayo cisbitaalka ay sababeen murugo dheeraad ah oo aan loo baahnayn. Dadka qaar ayaa sheegay inay ka heleen warar isburinaya iyo qaar aan iskumid ahayn NEW Zealand Booliiskooda iyo shaqaalaha cisbitaalka 24kii saacadood ee ka dambeeyay weerarkii argagixisada ahaa. Rajadaa beenta ah ayaa sababtay murugo dheeraada.

6 Dadkii aanu la kulanay way ka cadhaysnaayeen waqtiga dheer ay qaadatay inta dadkoodii dintay laga qaadayay Meesha, iyo inay dadkoodii gartaan. Marbuu qof qoysaka dhaw kamidi noo sheegay inuu dhimashada qof qoyskiisa ah ka akhriyay jaraa'idka iyagoon Booliiska New Zealand iyaga horta ogaysiin.

7 Qoysaskii dhibtu gaadhay qaar kamida ayaa aad u cadhaysnaa iyagoo loo diiday inay galaan xaydaankii ay Booliiska New Zealand goobta ku xidheen si ay u baadhaan ehelkoodii. Waxaa lanoo sheegay inay qaar daawadeen video-gii weerarka uu toos usoo gudbinaayay "QOFKU" si ay uxaqiijiyaan ehelkoodii in la dilay iyo inkale ayna ka helayaan cisbitaalk.

> *War la'aan, xidhiidh la'aan, in loo galo masaajidka ay ehelku ku jiraan iyo diidmada Booliisku celiyeen shaqaalaha caafimaadku inay gudaha galaan saacado oo isbiirsaday ayay dhibaneyaashu isdhiibeen oo ay dhadacdan ku xasuustaan in la tusay sagsaag cadaawad leh iyo taxadir la'aan.*

8 Dadku waxaa kale oo ay ka cadhasnaayeen mudada dheer ee ay qaadatay in la garto dadka cisbitaalka lagu daweynaayo. Waxay iswediiyeen inay khibrad la'aanta iyo aqoondarro aanay garanay dhaqanka Muslimka sida magacyadu yihiin, iyo hab qoraalkaooda taas oo laga yaabo inay dibudhaca ka tahay qayb. Tanina waxay sii kordhisay jahowareerka ay qaadeen xubnihii qoysaska oo isku deyaayay inay heelaan ehelkoodii ay jeclaayeen ama gartaan waxa ku dhacay.

9 Qof kasta oo aanu la kulanay, haday ahaayeen qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii ama goobjoogeyaashii weerarka argagixisada ah, waxaay mareen diiqad, cadho,baqdin, cadaadis, niyad jab, walaac, shaki iyo/ama dembi isasaar (leh maxaad u noolaatay). Dad badan ayaa qaatay ama weli qaata la talin ama taageero maskaxda ah qaarna waxayna ka dhigteen taageero u socota. Dadka qaarbaa waxay yidhaahdeen inay xaasaskoodii iyo caruurtoodii qaadeen culays maskaxeed.

10 In badan oo qoysaskii dhibu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaashaoo ah oo aanu la hadalay way ku adagtahay inay seexdaan sababo ay ka mid yihiin inay ka baqaan riyada ama lagayaabo inay arkaan ama ay dareemaan dagnaan intay hurdaan. Khibradaa ay arkeen dad ku jira daqiiqadii udambeeyay noloshooda ayaa la socota. Waxaanu maqalay tusaaleyaal badan oo qaraw baqdin leh iyo humaagyo ay u arkaan si joogto ah, waxay yidhaahdeen:

> *... Waxaa fiican in lasoo jeedo dadkana lala hadlo, halkaad intaad seexato ka qarwi lahayd.*

11 Waxay noo sheegeen waalidka caruur ka badbaaday weerarkii argagixisada ahaa, inay badbaadeen waayo waxay kareen inay ka baxsadaan labada masjid, oo aan ilaa waqtigaa sidoodii ahayn. Caruurta qaarbaa muujiyay dabeecadoodii oo isbdeshay, iygoon doonayn inay iskuulka ku noqdaan ama aan rabin inay ka nixiso qaylada dheeri. Hal waalid ayaa iisheegay inay dareemayeen inay ilmhoodii waayeen, inkastoo ilmahoodi jidhahaan uu ka badbaaday weerarkii argagixisada ahaa.

12 Qaarbaa werwer noo muujiyay saamaynta ay waqtiga dheer ku yeelanayso caruurta, faaleeyayna inay cadho ku reebto waxii dhacay. Waxaa la noo sheegay inay muhiim tahay in lala socdo caruurta Muslimka ah ee ku nool Christchurch, lana siiyo taageero joogto ah ilaa muddo dheer si ay uga bogsadaan weerarkii argagixisada ahaa.

13 Waxaa la noo sheegay in qaar ka mida goobjoogeyaashii weerarkii argagixisada ahaa oo aanu dhaawac jidh soo gaadhin aan la siinin taageero ilaa ay cid kale oo saddexaad soo gasha si ay u caawiyaan. Qaar kale oo doontay caawimo waxaa loo sheegay inaanay xaq u lahayn iyo/ama aanay soo xulin hey'adaha qaybaha Bulshada ama hey'adaha aan dawliga ahayni inay dhibane weerarkii argagixisada yihiin. Tiro dad ah ayaa noo sheegtay inay jiraan kala duwanaansho cidda u qalanta taageerooyinka kala duwan, arrintaas oo aanu xaga hoose kaga hadlidoono.

## Saamaynaha heerka Labaad

14 Qoysaskii waxyeeladu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii ayaa nala wadaagay saamayno kala duwan oo si muuqata u taabtay noloshooda. Xidhiidhka dadka qaar (xaaska/ninka, qoyska iyo saaxiibada) ayay saamayn ku yeelatay arrintani. Taasi waxay ka dhalatay arrimo sida kala aragti duwanaan qoyska dhexdiisa iyo sida loo qaybsanayo taageeradii dhaqaale ay dawladu bixisay ama waqtiga taageerada dadkaaga aad jeceshay qaadanayso. Waxay ahayd caadi in qoysku debedda ka yimaadaan isu garabtaagaan ehelkooda ka badbaaday weerarkii argagixisada ahaa. Tani waxay yeelan karaysay cawaaqib taban waanu maqalay inay:

> *... waxyeelo ku noqon karto xubnaha qoyska kuwa ku haysta shaqooyin heer sare ah iyo nolol dhisan oo deggan debedda. Gudaha [New Zealand] shahaadooyinkooda iyo khibradooda shaqo, waxaa laga yaabaa inaan la aqoonsan aakhirkana waxay ku ridaysaa qulub iyo cadaadis iyadoo qoysku marka horeba dagnaa.*

15 Qoysas badan oo aanu la kulanay, ninkii ayaa ladilay ama dhaawac xumi soo gaadhay. Dumarka qoysaska qaarkood, cawaaqibkoodi wuxuu gaadhay heer qiiro badan oo ka xun saamayntii weerarkii argagixsada. Qaar badan waxay u ahayd inay waayeen kii quudinaayay qoyska. Dumarka qaarbaa ka qaadanaya door cusub qoyska dhexdiisa oo barta xirfado cusub sida dareewal ama aqoonta dhaqaalaha. Isla markaa, dumarkaasi waxay inta badan waxay sidaan mas'uuliyadda waalidnimo, iyagoo qaabilaya tiiraanyadooda iyo kasoo kabashada baahiyaha jira. Arintani waxay xadidaysaa waqtigooda awoodda ay ku doonanayso taageero iyo inay helaan shaqo lacagi ka soo gasho ama wax barasho.

16 Dad yar ayay geeriyo kale ku yimaadeen ama xanuunno qoysaskooda dhaw in yar kadib 15kii March 2019kii, kuwaas oo ay u aaneeyeen saamayntii weerarkii argagixisada. Waxaa lanoo sheegay qoys laba qof wadno xanuun kaga dhacay bilo kadib 15kii March 2019kii, kuwaasoo mid khatar ahaa. Labada xaaladoodba qoysku waxay u aaneeyeen wadna xanuunka culayskii iyo haraatidii weerarkii argagixisada ahaa. Badbaade kale ayaa ninkeedii ku weyday shil baabuur maalmihii ka dambeeyay 15kii March 2019kii. Waxay sheegtay inuu qulub ku dhacy waayo saaxiibadii ayaa ku dhintay weerarkii argagixisada ahaa, taas oo ku keentay hurdo yaraan. Daalka iyo tacabka taasi keentay ayaa loo maleeyay inay ka qaybqaateen shilkiisa

## Taakulo ka timi ururada New Zealand inteeda kale

17 Dadka qaar ayaa soo tebiyay inuu dareenkoodii dhiiri geliyay taageerada dadka reer New Zealand aan muslimka ahayn. Qaar badan ayaa ka hadlay niyad wanaagga ay ka arkeen ama ka heleen dadka daafaha dalka ku nool kadib weerarkii argagixisada ahaa. Waxaa jiray dareen keenay fursad lagu hagaajin karo isku dhawaanta bulshada, midawga iyo isku xidhnaanta u dhaxaysa beelaha (communities).

18 Waxaanu maqalay in looga mahadnaqay taageerada ay tuseeen saaxiibada iyo jaarku, iyo hal qoys oo sheegay inay taasi siisay dhirigelintii ay u baahnaayeen si ay u joogaan New Zealand waqti ay ku fekereen inay guuraan kadib weerarkii argagixisada ahaa. Waxaa jirtay rajo inay taageerada ay reer NewZealand natuseen inay sii socoto oo aan la ilaawin markuu waqtigu socdo.

## In laga helo taageerada haboon hey'adaha Bulshada qaybaheeda way adagtahay

19 Mahadnaqa laga sheegtay oo ay keentay markii caamahaan laysu damqaday iyo taageerada reer New Zealand waxaa barbar socda, inaanu maqalay cadho ka imanaysa qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii darteed wixii ay ka arkeen la macaamilka heyadaha Bulshada qaybaheeda markii ay taageero ka doonteen,. Mawduucyada guud waxay ahaayeen iyadoo aanu jirin isfaham dhaqan, waxay ka timi taagdaro la'aan iyadoon sare looqaadin awoodda dhaqanka iyo siyaasadaha iyo dhaqamada aan lahayn waxqabad ku filan si ay u kaabaan baahida dadku u qabaan inay ka bogsadaan gaarahaan dhacdadan, inkasta oo aanay caadi ahayn.

**Aad ayay muhiim u tahay in si mug leh loo dhegeysto,**
**la taageero oo si rasmi ah loola falgalo - Dhammaan**
**saddexdaa arrimood lama kala reebikaro – iyadoo**
**bulshada ay saamaysay, midba mar, ay karto inay siiso**
**adeegga ku haboon iyo taageero**

Xubin qoysaskii ay saamaysay ah

### Dhaqanka oo aan la fahmayn

20 Dad badan oo aanu dhegeysanay waxay sheegeen, guudahaan inaanu Isfahan dhaqan dhex oolin iyga iyo shaqaalaha jooga heyadaha Bulshada oo aany aqoon waxay bulshada Muslimku rumasanyihiin iyo caadooyinkooda.

> *Qoysaska dibanaha ah waxaa loo soo bandhigay adeegyo ah wax iswedaarsi, waqti gaaban iyo qiyaasti aragti gaabani. Marna may dhicin in si cad loogu hawlgalo oo la fahmo sida ay bulshada dhibanaha ahi u shaqayso, ama la aqoonsado adkaanta iyo khibradda dareenkooda iyo xasuusta sheekadooda ku duugan.*

21 Waxaa la noo sheegay inaan meelahan la garawsan godalooda iyo in yar, hadii ay jirto, oo dedaal ah ayay sameeyeen heyadaha qaybaha Bulshada si ay u abaaraan.

> *Halkii ay kakordhin lahaayeen loolanka si ay adeegyada u hagaajiyaan oo fuliyaan dhaqanka iyo in si karti leh diinta loogu tababaro, hey'aduhuna ama waxaanay fulinayn tababarka ama waxay ku tiirsanyihiin dad ka mida bulshada Muslimka oo aan u lahayn khibrad meelaha ay ka soo jeedaan iyo tababarka aqoonta diineed si ay u hagto tilmaanta iyo calaamadda la tusay oo ay ka jawaabaan.*

22 Waxaanu maqalay adeegga iyo taageerada ay bixinayaan hey'adaha Bulshada iyo ururada aan dawliga ahayni badanaaba si fiican uma aqoonsana dabeecad ahaan sida ay u kala duwanyihiin shacabka Muslimka ahi markaana ma fuliyaan baahiyaha kala duwan. In ka badan 50 wadan ayay ka kala yimaadeen oo ay isugu jiraan dadka yimaada Musjid al-Nur iyo Xarunta Islaamka Linwood. Af iyo dhaqan kala duwan ayay leeyihiin, sida lanoo sheegay, taasi waxay sii kordhinaysaa marka horeba dabeecaddii ku adkayd qaybaha hey'adaha Bulshada inay la falgalaan. Waxaanu maqalay:

> … *Iyadoo weerarkii sannad ka soo wareegay, inay qoysas sugayaan helitaanka adeegyadii ku haboonaa ee ay u qalmayeen oo dhan kuwaasoo dhaqanahaan iyo af-ahaanba ka jawaab celinaya isla markaana abbaaraya baahiyahooda culus.*

23 Qoysaska qaarbaa dareensanaa inay Meesha ka maqantahay in si dhab ah looga hawlgalo si loo fahmo baahiyahooda; dhaqan ahaan, wax qabadahaan, maskaxahaan iyo waxyaabo kaleba. Go'aankiina, waxay dareemeen in habka ay hey'adaha Bulshada usiiyeen taageero ay ku soo kabtaan may ahayn sidii ufiicnayd ee hawsha u qaban lahaa markaa waxay noqotay inay uqaataan inay Qaybaha Bulshadu iyaga takoorayaan.

24 Kulamada ay soo qabaqaabiyeen heyadaha Bulshada waqtiyada qaar may ujoogin turjumaano ama qof ku hadla afafkii ku haboonaa looma keenin. Waxaa kale oo lanoo sheegay inay sidaas oo kale ku dhacday qoysaskii uu saameeyay weerarku, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii markii ay waraysanaayeen Booliiska New Zealandmarkii ay socotay dembibaadhista weerarkii argagixisada ahaa. Qoysaskii dhibtu dhacday, badbaadeyaashii

iyo goobjoogeyaashii waxay ubaahdeen inay xubno qoysaskooda ahi uga tarjumaan su'aalii booliiska. Waxaa lanoo sheegay inay taasi kusii kordhisay urugadii (trauma) haysay qoysaskii dhibtu ku dhacday, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii iyo xubnihii qoyskooda ahaa ee u tarjumaayay.

25 Waxaa kale oo lanoo sheegay la'aanta tarjumaad hagaagsani inay sii weynaysay caqabadaha dadka qaar kala kulmeen inay fahmaan inay dooran karaan taageerada loo hayo iyo siday uqiimaynkaraan tii ay xulanlahaayeen. Xaaladaha qaar taa macnaheedu waxay tahay inay dadku ku tiirsanaayeen xubno qoyskooda ahi inay uga tarjuman waxay ku hadlayaan hey'adaha qaybta Bulshadu, waxakaloo lanoo sheegay waqtiyo ay dadka qaar dareemeen xubnahan qoyskooda ahi inaanay dhexdhexaad ahayn ama aanay gudbinayn warka khuseeya oo dhan.

26 Waxaa kale oo aanu ka maqalay qaar badan oo qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii ka mida inay la kulmeen caqabado ka haysta helitaanka 'visa' cusub ama kordhinta 'visa-da' xubnihii qoyskooda ee u yimi New Zealand inay caawiyaan intay nolosha caadiga ah ku soo noqonayaan. Tusaale, dumarka ay ka dhinteen raggoodii ee qoyskooduna wadan kale ku noolaa, waxay ogaadeen ehelkooda in guudahaan la siiyay 'visa' waqti gaaban ah si ay uyimaadaan New Zealand oo taageeraan. Tan isma qabanayaan baahidooda ah inay taageero waqti dheer ka helayaan ehelkooda intay caafimaadayaan.

27 Dadku waxa kale oo ay ka werwersanaayeen shuruudda ah inuu qofku joogay New Zealand 15kii March 2019kii si uu xaq ugu yeesho'visa' uu ikhtiyaar uleeyahay oo ay dawladu u diyaarisay dadka taageerada u imanaya. Qaarbaa cadho ka muujiyay inaan la samayn ogolaansho khuseeya duruufahooda gaarka ah.

### Siyaasadaha iyo ku dhaqanku maaha waxqabad ku filan inuu taageero baahiyaha soo kabashada

28 Inbadan ayaanu maqlay hey'adaha Bulshada sida ay ula shaqeeyaan qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha. Iyadoo dadku ka hadlaan sida guudahaan taageero naxariis badan ay uga heleen shacabka iyo heyadaha Bulshada toos kadib weerarkii argagixisada ahaa, waxaa kaloo lanoo sheegay inaanay hey'adaha Bulshada isku duubnayn oo debecsanayn.

29 Markaanu dhegeysanay qaar kamida qoysaskii dhibtu gaadgay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii waxaau ogaanay waxyaabo ay soo mareen intii ay soo kabanayeen oo kusoo celiyay tiiraanyadii iyo/ama qaar sababay diiqad dheeraad ah. Waxaa lanagu yidh:

> *...qabsadaa markaasay wixii ka lumay macno u sameeyaan, kadibna siyaabo badan khibradaha xiga ee lagasoo arkay hey'adaha dawladda ilaa bilihii weerarka ayaa waxay qaar badan u aheen hawl ruwaayadeed dib.*

30 Waxaanu maqalay in sida ay heyadaha qaybha Bulshada ula dhaqmeen qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha weerarkii argagixisada ahaa gelisay dadkii dareen ah inaanay awood lahayn taasoo ugu darsantay dhibaatada haysata.

*Ilaa hadda, in badan oo dhibaneyaashii ah ayaa dareensan inay qaar kamidi iska hortaageen noloshii caadiga ahayd ee dhaqaale iyo dareen ahaanba. Tanna waxaa ugu wacan awood-darrida adeegyada loo bixinaayo iyo iydoo ay maqantahay dib u dhiskii ama dib usoo celintii loogu talogalay waqti dheer – marka shacabku waayo taageero maadiya oo dib loogu dhiso iyo taageero ku wajahan ujeedada qofka weerarka geystay iyadoo loo warramayo ama laga wacigelinayo xagga imaankooda iyo bulshadooda.*

31 Waxa lanoo sheegay inaan ujeedada qoraalkii saamaynta dhibanaha (victim impact statement) si fiican loogu sharixin qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii. Qaar badan ayaa noo sheega inay u baahnaayeen in laga taageero afka laakiin shaqaalaha maxkamadaa Wasaaradda Caddaaladda noomay qaban turjumaanno naga caawiya hawsha socota intaan xukunku bilaabmin. Tani waxay ku keentay qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii inaanay gelin hawsha. Qof aanu la hadalay ayaa noo sheegay inay markii hore hawshu ku hogaamisay inay culayska saaraan samaynta taban ee weerarka argagixisada ee lagu soo qaaday oon awood siinayn. Qoraalkii ay ugu dambaystii ay maxkamadda ku sameeyeen ayaa ahaa mid awood lagu siinayay, laakiin kumuu salaysnayn "formka" caadiga ah ee la siiyay.

32 Qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii qaarkood waxay ka cadhaysnaayeen faraqa udhexeeya qoraalada saamaynta dhibanaha iyo qoraalkii hore ay siiyeen Booliiska New Zealand markii ay booliisku baadhista weerarka argagixisada samaynayeen.

### Xiriir la'aantii ka dhexaysay Hey'adaha Bulshada

33 Hey'ado Qaybaha Bulshada oo badan ayaa ku lug leh taageerada inay soo kabtaan kuwii ka badbaaday weerarkii argagixisada ahaa ama kuwii ay kaga dhinteen dadkoodi. Qoysaskii ay saamaysay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii la macaamilay heyadaha, gaarahaan Shirkadda Magdhawga Shilka (Accident Compensation Corporation), Wasaaradda Harumarinta Bulshada (Ministry of Social Development) iyo Taageeraha Dhibanaha (Victim Support), ayaa nagala hadlay inay dheeraad bixiyeen tageerada iyo adeeggaba, sidoo kale ay jiraan daldaloollo, iyo isku xidhnaasho la'aan heyadaha dhexdooda.

*Daryeel la'aanta waxaa badiyay la'aanta isku xidhnaanta. Maaha hal ama laba kulan, ama hal ama laba heyadood, laakiin dhammaan wey dhacaan weliba isku mar ayay dhacaan.*

34 Tan ayaa waxay ugu biirtay diiqad ay dareemeen qoysaska, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaashu iyagoo marwalba in badan ku celcelinaayay sheekada dhibta haysata, qaarbaana weli ubaaha inay arrintaa sii wadaan iydoo ay 18 bilood kaoo wareegtay falkii argagixisada.

35 Dhibaatooyinka ka yimi in lala macaamilo heyado Bulsho oo badan waxay uga sii dartay iyadaanay jirin war wadaag ka dhexeeya hey'adaha ay khusayso, iyo iyadoo cagajiid la caadaystay halkii laga raadinlahaa xal waxqabad leh si loo abbaaro baahiyaha baaxadda leh ee yimi.

> *Hey'aduhu waxay u shaqeeyaan keli keli waanay diidaan in midba ka kale la wadaago warka, taasoo ku khasbaysa dhibaneyaasha inay la macaamilaan dhawr qof oo kala dun hey'adda dhexdeeda. Way caddaatay inay hey'adaha dawladda isticmaalaan "the Privacy Act 1993" sida hab aanu midna ka kale warka ula wadaagin.*

36 Qaarbaa soo jeediyay inay u fiicnaanlahayd qoysaska, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha haday la macaamililahaayeen heyad Bulsho keliya.

37 Waxaa lanoo sheegay inay caqabadahani badanaa kusii adagyihiin qoysaska, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha markii hore ahaa qaxoontiga iyo muhaajiriinta (Daldoorsadeyaal).

> *Bulshadani ma karayso inay dhex maaxdo hey'adaha qaybaha Bulshada ee tirada ka batay mana fahmayaan caqabadaha hey'adaha ee jira kana horyimaada dadka doonaya inay galaan arrimo ku saabsan dawladda, kuwaas oo ay ku jiraan siyaasado aad u tiro badan oo loo samaystay waxyaabo dhibaneyaashu xaq uleeyihiin oo kalduwan.*

38 Marka lagu daro dhaqan faham la'aanta aynu kor kaga soo hadalay, qaarbaa dareensanaa inaanay taageerada la siiyay inaanay ku haboonayn baahida qoysaska, badbaadeyaasha goobjoogeyaasha ka soo jeeda dadkii markii hore ahaa qaxoontiga iyo muhaajiriinta.

39 Werwer joogto looga hadlo ayaa ahaa inaanay hey'adaha qaybaha Bulshada iyo ururada aan dawliga ahayni macne isku mida ulahayn waxay xaq u yeelankaraan kuwa loo garto inay yihiin dhibaneyaal, lagamana helaayo dhaqdhaqaaqa dhaqaneed. Tusaale ahaan, inkastoo Sharcga Xuquuqda Dhibaneyaasha 2002 (Victims' Rights Act 2002)[2] lagu qeexay qoyskaaga cidda kuu xigta ay ku jiraan "qaar kale oo dhaqan ahaan loo aqoonsayahay inay qoyska ka midyihiin",[1] xaq ulahaanshaha taageerada badanaa waxay leedahay qeexid adag cidda qoyska ah.

> *Fikradda reer galbeedka ee "nuclear family"ama halka qoysku ka unkamo ayay qaateen hey'aduhu inta badanna ma aqbalaan ta dhaqan ahaan saxda ah iyo sida qoyska laysu raaciyo ee la aqoonsanyahay.*

---

[1] Qaybta 4, Xeerkii Xuquuqda Dhibanaha ee 2002.

40 Waxa lanoo sheega saamaynta ay ku leedahay sida ay u qeexdaan hey'adaha Bulshadu qoyska awoodda dadku ugu qalmayaan taageerada iyo adeegga dawladda, gaarahaan shuruudaha isku qasan iyo adeegga iyo taageerada la bixiyo oo aan joogto ahayn. Waxaas oo dhammi waxay ku keeneen qoysaska xaalado caafimaad, maskaxeed iyo shaqo la'aan iygoo markii horeba dagnaa weerarkii argagixisada ahaa ka hor.

41 Waxaanu kaloo maqalay in shuruudaha lagu aqoonsado dhibaneyaasha aan si iskumida loo adeegsan. Si gaar ah waxaa la noogu sheegay in heerka taageerada lagu bixiyaa kala duwan yahay iyadoo ay ku xidhantahay shaqaalaha hey'adda Bulshada ee bixinaya iyo inay dadku qaateen adeeyo kal inkastoo ay nooca naafonimadoodu isku mid tahay. Tani waxay keentay in loo qaato inaanay hey'adaha Bulshada iyo ururada aan dawliga ahayni u kala samaynayaan dhibaneyaasha derajooyin kala duwan ama list kala illudnasho dhibamayaasha ah, taasoo marmar keenta calool xumo iyo xidhiidh murugsan.

42 Qoysaskii waxyeeladu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjooeyaashii qaarkood ayaa sheega inay jiro kala fogaan udhaxaysa waxay wasiiradu fagaare kaga balan qaadeen iyo xaqiiqada ay shaqaalaha hey'adaha Bulshada ula dhaqmaan xaalad kasta. Waxaa lanoo sheegay ballanqaadyo ay sameeyeen hey'adaha Bulshada oo anay sidoodii ufulin, inta badan iyagoon sharaxaad ka bixin sababta ay u dhacday. Waxaa la diiday codsiyo taageero mararka qaar iyadoo aanay qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaashu helin fursad ay ku helaan war dheeraad ah ama aan loo sharaxin sababta go'anka diidmada ah loo gaadhay.

### Habka loo abbaaray aan lahayn debecsanaan

43 Iyadoo dad badani mahadnaq ka sheegteen taageerada ay heleen, waxaanu maqalay in xaaladaha qaar taageerada ay dawladda ka helaan dadkii ku waxyeeloobay weerarkii argagixisada ahaa aanay ku fileyn inta la siiyaa, ama marwalba kuwo xaq u leh aan loo sheegin waxay u qalmaan. Warar lana soo gaadhsiiyay ayaa sheegaya in habka ah "hal qayaasa ayaa wada leeg" ee ay hey'aduhu u adeegsadeen soo kabashada inaau ku fillayn.

> *Inkastoo hey'adahani wanaagsanyihiin, dhibaneyaashu waxay soo sheegaan caqabado: mid dhaqaale, caafimaad, jidh, dareen iyo ruux. ... Warka soo noqnoqonaya ee dhibanuhu soo sheegayaa waa inaanay dawladdu aad u habaysnayn si ay u fahmaan una abbaaraan baahiyahooda.*

44 Waxaanu maqala in inta badan taageerada ay bixiyaan hey'adaha Bulsadu ku wajahanyahay caawimo waqti gaaban ah, taasoo aan daboolayn, si dhaqanka ku haboon, bahiyaha muddo jiraay ee bulshada uu si mug leh u aafeeyay weerarkii argagixisada. Tusaale ahaan, waxaa lanoo sheegay inay soo kabshada loo baahanyahay ku jirto fikrad ah in dibudhis waqti dheer bulashada loo sameeyo taasoo bulshada u suurto gelinaysa inay isku fillaadaan oo aanay dawladda ku tiirsanaan. Taa waxaa ka mida in lagu daro soo jeedinta in la siiyo amaah aan dulsaar lahayn (taasi waxay ku imanaysaa diinta oo diidan dulsaarka) si ganacsigooda loogu taageero, halkay ganacsiyadu u baahnaan lahaayeen inay ku tiirsanaadaan taageero dhaqaale oo waqti gaaban ah oo ay siiyaan hey'adaha Bulshadu.

45 Dad yar ayaa dareemay inaanay Shirkadda Magdhawga Shilalka - SMS (Accident Compensation Corporation) nidaamkeedu ulahayn jajabnaan dhacdadan oo kale, sida faliidhada rasaasta ee ku hadha iyo dhaawaca nerfaha. Tusaale ahaan, badbaade ayaa ku wareeray kala saaridda waxa u dhexeeya Shirkadda Magdhawga Shilalka hankeeda iyo talada caafimaad ee ay heleen kuna saabsan soo kabashdooda. Badbaaduhu waxa uu dareemay inay culays saareen SMS inuu shaqadii ku noqdo inkastoo talo caafimaad lagu siiyay inaanay sidaa samayn.

46 Aragtiyo kuwaa u eeg ayaa lanaga siiyay hey'ado Bulsho oo kale. Tusaale ahaan, dumarka qaar raggoodu usoo xoojinjiray ayaa sheega inay dareemeen inay Wasaaradda Harumarinta Bulshada ku cadaadiyeen inay caruurtooda aan gaadhin da'da iskoolka geeyaan meel lagu xanaaneeyo si ay shaqo u doontaan.

47 Waxaanu maqalay in loo baahanyahay in arrimaha socdaalka dacwad iyo dacwad looga fiirsado marka la eego adakaanta duruufaha qoys walba. Arrintani waxay gaar u ahayd xubno kamida bulshada Somalida oo ehelkoodi dhinteen ama ka badbaaday weerarkii argagixisada ahaa. Taana waanu maqalay inkastoo ay noo yaalleen shuruudo socdaal inaau taageerno kuwii  uu aad u saameeyay weerarkii argagixisada ahaa, qoysasku waxay la kulmeen caqabado gaar ah, kuwaas oo ay u aaneeyeen New Zealand oo aan aqoonsanay inuu baasaboorka Somalidu dhokumanti sax ah oo lagu soconkaro yahay (inkastoo hey'adaha Bulsha qaar xaaladaa qaxoontiga u aqoonsadaan). Taa darteed ayay ugu adkaatay inay taageero qoys ka helaan Somalia, xaaladaa qaarna qoysas baa weli sugaaya in haruumar laga sameeyo.

48 Qaarbaa soo jeediyay in Socdaalka New Zealand (New Zealand Immiigration) u sameeyaan dalkugal (entry visa) qoysaska si ay ugu socdaalaan gudaha iyo debedda New Zealand ujeedo taageero darteed oo noqonaysa dhexdhexaad ilaa waqti dheer si looga yareeyo dadka murugaysan culayska maamulka.

49 Waxa sidoo kale lanoo sheegay inay wax ka maqanyihiin taageerada ay helaan qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha taasoo ku xidhan nidaamka cadaaladda denbiyada. Tanna waxa loo qeexay sidan:

> *... murugo (trauma) aad looga xanshashaqay in laga reebay qaabka dembiga (criminal process) iyo inaanay karikarin inay wax ku kordhiyaan ama dareemaan inay qayb muuqata ka qaataan shaqada socota.*

50 Waxaanu maqalay jahawareer iyo rajobeel iyo aaminaad la'aan ay badanaaba keentay aqoonsi la'aanta dhibaneyaasha maraya habka caddaaladda dembiyada (in criminal process), iyo dareenkooda ah inaan cidi dhegeysanin. Arrimaha iyo werwerrada qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha ay haysteen gaarahaan dacwaddan waxay dad u arkeen inay ahaayeen arrimo lasoo bandhigay oo si baahsan ugaga horyimaadda dhibaneyaasha Nidaamka Caddaladda Dembiyada ee New Zealand.

Waxaa laga dacwooday nay kala go'een mabaadi'dii xuquuqda dhibaneyaasha sida ku xusan koodhka dhibaneyaasha "the Victims Code"[2], iyo khibradaha dhibaneyaashu ka arkeen nidaamka caddaaladda dembiyada oo ay raacdo dib usoo noolayn urugo (retraumatisation).

51 Qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha qaarkood ayaa noo sheegay inay dareemeen baqdin hal jeer markay tageen maxkamadda, waayo qof maxkamadda debeddeeda taagnaa ayaa u muujinayay aragtiyo saraynta caddaanka ah qoysaska iyo badbaadeyaashu markay soo galeen maxkamadda.

52 Dadka qaarkood ayaa noo sheegay in markii la eegaayay baahiyaha kabashada, hey'adaha Bulshada uma sheegaan kuwii goobjoogga u ahaa weerarkii argagixisada ahaa laakiin aan sinaba u dhaawcmin. Waanu maqalay inay dad ay ku dhacday diiqadda urugada ka dambaysaa (post – traumatic stress) oo ah dad badan oo goobjoog ahaa, waxaanay dareensanyihiin inaanay helin taageero ku filan waayo ma buuxinayaan shuruudaha ay hey'adaa Bulshada ku qeexeen dhibaneyaasha.

### Shaqaaluhu ma ahan kuwo jilicsan

53 Dadka qaar ayaa dareemay inaanay lahayn hey'adaha Bulshada dareen iyo ogaanshaha dadka ay ahayd inay taageeraan waxaanay u muuqdeen qaar aan khibrad u lahayn wax ka qabashada dadka la tacaalaya urugada (trauma). Waxa la nagu yidhi:

> *...waa loo baahanyahay inay hey'adaha iyo ururadu ulahaadaan ogaansho intaa ka badan baahiyaha dareen ee dhibanaeyaasha.*

54 Tani waxay ugu muuqatay qaar ka mida qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha markii ay la kulmeen hey'adaha Bulshada markaasoo ay dareemeen inaanay shaqaalahu ka falcelinayn hadii ay iyaga ama qoyskooda ka muuqatay inuu culays badani saranyahay. Dadka qaar waxa la siiyay war ka tan badan mar aanay karikarayn inay si fiican u fahmaan:

> *...halkay ahayd in dhegeysi fiicani jiro, waxaa yaalay war daad weyn ah; halkii ay ahayd inuu jirto cid u doodaa waxa jiray kulamo aan dhamaanayn.*

55 Tani waxay horseeday in dadka qaar isweydiiyaan inay shaqaalaha hey'adaha Bulshada si fiican u tababaraayeen ama loo carbiyay inay dadka urugadu (traumatised) hayso la shaqeeyaan.

2 Koodhka Dibaneyaasha waxa uu dejiyaa sida aad filayso in laguula dhaqmo dembi - http://www.victimsinfo.govt.nz/support-and-services/victims-rights/victims-code-full-text-version/



# Qaybta 3: Nolosha Muslimka ee New Zealand

1 Intooda badan qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha, iyo goobjoogeyaasha aanu la kulanay debedday uga soo guureen New Zealand. Mudada ay halkan ku noolaayeen waxay u dhaxaysaa bilo yar ilaa tobaanaan sannadoo. Qaarkood, khibradooda New Zealand waxay ku salaysnayd inay barbar dhigaan halkay ka yimaadeen.

> *Qaar badan oo dhibaneyaasha ahi waxay siteen urugo calami ah, taasoo ah ta ay ugu soo carareen New Zealand waxaanay waayeen ama ka yimaadeen ehelkoodii ay jeclaayeen, markaa qiyaastii way yarayd may jirin nidaamyo taageera oo ka kala yareeya urugada.*

2 Waxaanu la hadalay qaar NewZealand ku dhashay oo ah qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaal iyo xubno goobjoogeyaal ahaa oo lagu koriyay Muslim oo aan war ka haynin waxay barbar dhigaan waxay arkeen. Waxaanu kaloo la hadalay dad udhashay New Zealand oo muslimay.

## Caamahaan si togan ayaa loo arkaa New Zealand, laakiin waxaa jira takoor, cunsuriyad iyo cuqdad islaamka laga qabo oo baahsan

3 Badanaaba qosaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyashu waxay sheegeen in khibradooda New Zealand iyo reer New Zealand-ba waxay ahayd mid togan intii ka horaysay 15kii March 2019kii. Waxay yidhaahdeen caamahaan waxaa laga dareemaayay New Zealand nabagelyo iyo amaan, manay filayn in weerarkan argagixisada ah oo kale ka dhaco halkan. Waxay dareensanaayeen inay reer New Zealand intooda badani ahaayeen dad aqbalaad badan saxiibtinimo leh. Waxaanu maqalay dad jaar ah oo saaxiibtinimo iyo soo dhaweyn badan. Waxaanu maaqalay dad ka sheekeeyay goobaha shaqda inay yihiin dad aqbala ku dhaqanka iyo baahiyaa diiniga ah ee dadka kale, oo u ogolaada inay shaqada ka baxaan si ay salaadda Jimcaha usoo tukadaan sidoo kale siiya meel ay ku tukadaan saacadaa shaqada.

4 Inkastoo ay jiraan khibradahaa togani, in kudhaw dhamman dadkaanu la kulanay qofahaan waxaa soo gaadhay dhacdo takoor ah ama cunsuriyad ama waxa uu yiqiinay qoys iyo saaxiib ay ku dhaceen. Hal aragtiya oo lanala wadaagay ayaa ahayd inuu weerarkii argagixisada ahaa ee 15kii March 2019kii ahaa:

> *... mid ka duwan kuwa caadiga u dhaca, markaa waxa loo arkay weerarkan inuu yahay halkii ugu saraysay, aanuse ahayn mid ka reeban, nolosha Muslimka maalin kasta.*

5 Xijaabka oo ah calaamad diineed oo muuqata darteed, dumarka muslimka ayaa badanaa takoor ama cunsuriyad la kulma oo ay ku dhacdaa in aad uga badan ta ragga. Dumar badan oo xijaab xidhnaa aanu la hadalay ayaa sheegay inay wadooyin kaga dhaceen dhibaato dadka qaarna waxay sheegeen inay u werwersanyihiin qoyskooda iyo asxaabtooda xijaabka xidha. Dumarka qaar xijaaban ayaa sheegay inay baqdin dheeraad ah dareemaan hadii ay keligood baxaan. Waxay noo sheegeen inay iska ilaaliyaan inay tagaan meelaha laysugu yimaado iyo inay qabtaan waxyaabihii nolol maalmeedkooda ahaa intii ka dambasay weerarkii

argagixisada ahaa, sida caruurta iskuulka la geeyo ama in loo baxo galabtii socod. Qof dumara ayaa noo sheegtay inay xidhato shaadh madax (hooded) leh markay joogto meel fagaare ah si ay u qariso xijaabka.

6 Waalidiinta qaar ayaa noo sheegay xoogsheegasho iyo hadal dhaawacaaya caruurtooda oo iskuulka loogu geystay ama markay xaafadda u baxaan. Dad badan oo aanu la hadalay ayay ku dhaceen in loogu dhawaaqo takoor ama hadal dhaawacaya oo ay u geysteen dad wada gawaadhi agmaraysa. Dadka qaar ayaa waxaa ku dhacay ka dhiga inay qalad ka fahmeen ama fikrad qalada ka qaataan diinta muslimka, hadana markasta waxay ku ahayd dhaawac.

7 Dadka qaar ayaa noo sheegay in lagu cunsuriyadeeyay shaqada ama markaad isku daydo inaad shaqo doonato. Dad baa markay shaqo waayaan muujiya jahowareer, inkastoo ay ka aqoon sareeyeen shaqada ay doonanayaan. Waxay tan u aaneeyeen inaanay lahayn magacyo ingiriisi (Engilish) ah oo dhaqan u ah. Qaar doontay shaqooyin badan oo ay aqoon sare u lahaayeen ayaa u maleeyay in warasiyo aad u yar ee loogu yeedhay ay ka dambayso eexi. Waxaanu maqalay haweenay loogu yeedhay waraysiyo badan kadib markay magaceedii u bedeshay magac hidaha ingiriis ah keliya si ay shaqo ugu doonato.

8 Dad yar oo aanu la kulanay ayaa sheegay inay dhacdo dacwad takoor ah u gudbiyeen Booliiska New Zealand, laakiin may dareemin inay natiijo togani ka soo baxday. Ama aan ashkatada rasmi loo diiwaan gelin, ama waxay dareemeen inaanay Booliiska New Zealand arrin weyn dhacdada u qaadan. May maqal wax ay Booliiska New Zealand kaga soo jawaabeen wixii ka soo noqday dhacdadii ay dacwadday gudbiyeen. Dadka qaar, tani waxay dhaawcday aaminaadoodii Booliiska New Zealand, taasoo abuurtay shaki inay Booliiska New Zealand wax ka qabtaan marka ashkato loosoo gudbiyo. Khibradaha caynkaas ah ayaan ku dhiirinay dadka inay usoo gudbiyaan werwerka ay qabaan Booliiska New Zealand inay ogaadaan. Waxa lanagu yidhi:

> *… labada masjid ay wax ku dhaceenba way isku raaceen inkastoo la gudbiyay wargelino badan oo ku saabsan dabeecado shaki leh oo ka dhacay gudaha iyo agagaarka masaajidada. … Booliisku waxay siiyeen fiiro aan kufilayn. … Dadka Meesha degani waxay arrintan u arkeen in Meesha laga saaray mas'uliyadii ka saarrayd, sidoo kale in la garwaaqsado in Muslimka loo geysto loona geysan jiray cunsuriyad, iyadoo lagu baxsanayo xagjirnimo midig fog ah iyo hanjebaadda caddaanka isasaraysiiya, markaa waxay ahayd in la helo ballanqaad daryeel sugan, jawaabid iyo foojignaan Booliisku qayb ka yihiin.*

9 Dacwado kale, waxay dadku sheegeen inaanay isku kelifin inay  dacwo ka dhiibaan dhacdooyinka takoorka ah waayo waxay arkeen qaar bulshada ah oo sidaa samaynaya, oo aanay kasoo bixin natiijo togani. Qof ayoo noogu muujiyay sida soo socota:

> *… hadda xidhiidh caynkaasa ma lihin waayo  bulsho ahaan waxaanu dareemaynaa inaanu nahay derejada labaad. Iyagaa dareenkaa na tusay markaa aaminaad kama hello Booliiska. Imisa goor ayaad doonaysaa inaad u tagto haday ku tusaan dareenkaa aamindarada ah. Waxaad gaadhaysaa heer aanad*

*aaminayn oo aad dareemayso inay wax socdaan, markaa waamaxay sababtaad Booliiska ugu tegaysaa? Waa markaa markaad aad khatar u noqonaysaa waayo waad ogtahay inay wax socdaan, laakiin dareenkaa iyo isaamin la'aanta adiga iyo Booliiska idinka dhaxaysa darteed faraq weyn ayaa adiga iyo maamulka idin dhex gelaya waanaad iska fogeynaysaa Booliiska, taasaa kaa celinkarta kuna ilaalinkarta. Hadaba sidaynu uga dhex dhisnaa isaaminaad oo ubaabiinaa faraqaa ah inaanay dareemin wadani derejo labaad ah.*

10 Qaar ka mida qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii waxay weriyeen in khibradoodii New Zealand isbedeshay ilaa 15kii March 2019kii. Inkastoo dadka qaar yidhaahdeen New Zealand waxaa weli laga dareemayaa ammaan, qaar kalena sheegeen inay dareemaan amman ka hooseeya kii hore. Werwerka ay ammanka ka qabaan ayaa qoysaska qaar dareensiisay inay gidaar isku wareejiyaan si ay kor ugu qaadaan nabadgelyada iyo ilaalinta dadka meesha deggan, markaa ay Booliiska New Zealand-na shaqada kordhiyaan si ay ula samaystaan xiriir dhaba bulshada Muslimka ah. Dad yar ayaa dacwad ka gudbiyay dhacdooyin takoor ah una gudbiyay Booliiska New Zealand intii ka dambaysay weerarkii argagixisada ahaa ee 15kii March 2019kii oo dareemay in si weyn loo qaderiyay.

## Saamaynta eexda (hala ogaado ama yaan la ogaanne) gaarahaan xagga warbaahinta

11 Qaar badan oo qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii ka mida oo aanu wax ka dhegeysanay waxay la tahay, in argagixisadii 15kii March 2019kii aanay ahayn waxaan lasii arkikarayn. Waxaanu maqalay:

*... dhacdadii maalintaa waxa laga sii arkaayay inay imanayso calaamadaha sheekooyinka laysu tebinaayay, waxaas oo dhammi iyagoo muuqday ayay iska indhatireen kuwii awoodda u laahaa wax ka qabashadeeda.*

12 Waxa la noo sheegay inay tani ku dhacay xaalad bulsho, ay ku jiraan Hey'adaha  Bulshada, oo inta badan qalad ka fahamsan bulshada Muslimka ah iyo guudahaan dhaqanka kala duwan. Dadku waxay dareensanaayeen inay eexasho dedani Hey'adaha Qaybaha Bulshada ku fidsanayd marka lala dhaqmaayo Bulshada Muslimka ah weerarkii argagixisada ahaa hortii iyo dabadiiba.

*Iyadoo aay u muuqan kuwa kale ee bulshada ka baxsan, xidhiidhka ka dhexeeya doodda guud ee Cuqdadda Islaamka laga qabo iyo siyaabaha gaarka ah ee ay bulshada Muslimka ay ula dhaqmaan Hey'adaha Dawladda waxay ku caddahay dhibaneyaashu waxay ku hadleen.*

13 Dadka qaarbaa dareemay inay hadalada takoorka ahi muddaba ku badanayeen warbaahinta, gaarahaan sannadihii u dambeeyay. Waxaanu maqalay qaylo guud oo leh waa in hanjebaadda khadadka tooska ah (online) loo qaato halis dhaba, lana baadho. Waxa lana tusay "YouTube videos" iyo bogag Facebook ah oo la soo hormariyay Cuqdadda Islaamka, takoor ama odhaaho nacayb ah oo kale, kuwa soo tebiyayna aad ayay uga werwersanaayeen.

**... bulsho ahaan waxaanu dareensanahay inaanu nahay derejo labaad. Dareenkaasay na geliyaan, anaguna kama hello aaminaad Booliiska (New Zealand). Intaasoo jeer keliya ayaad doontaa cid inaad u tagto haday ku tusaan dareenkaa aamindarada ah.**

*… Video-yadaa iyo bogaggaasi kuligood waxa lahaa dad deggan New Zealand. Xaaladaha qaarkood, waa la ogaysiiyay Booliiska New Zealand waxyaabo xagjir ah oo ku qoran, laakiin waxay dadku arkayaan inaanay saaxadaa baraha bulshadu waxba ka qabanayn inay ka saaraan qoraaladaa. Dadka qaarbaa dareensan, marka labada la'isbarbar dhigo, baraha ay ku qoranyihiin qoraalada 'Islamist-ka' xagjirka ah markiiba waa laga saaraa.*

14 Qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii waxay nala wadaageen waxay rumaysnaayeen oo ah inay New Zealand, telefishanada caalamiga ah iyo wargeysyada wax qoraa muslimiinta ka eexdaan. Waxaa lanoo sheegay inay u muuqato inay warbaahinta eexataa si weyn u badatay ilaa intii weerarkii argagixisada ahaa ee Maraykanka (USA) ka dhacay 11kii September 2001dii. Qaar badan ayaa muujiyay inay ka caroodeen (cadhoodeen) doorka ay warbaahintu ka qaadato inay isla wadaagaan fikradaha qaldan ee ku saabsan Muslimiinta iyo Islaamka, iyagoo ka hadlay inay warbixinahaasi qayb ka qaateen inay ku bataan New Zealand iyo caalamkoo dhan aragtiyaha Muslimka ka soo horjeedaa. Waxa la nagu yiri (yidhi):

*… warbaahintu way caayaan ama wax jin bay ku sheegaan Muslimiinta, ama ugu yaraan raali ayay ka noqdeen caydaa iyagoo ku guuldaraystay hadal adag oo kaa kasoo horjeeda, markaana taasi waxay keentay takoorka maalin walba taagan.*

15 Waxaanu maqalay saamaynta dhabta ah ee taban ay warbaahintu ka qoraan nolol maalmeedka dadka qaar, oo ay ku jirto in khalad laga fahmo Islaamka dadkana markay wadooyinka marayaan cay takoor ah lagu yidhaahdo. Waxay u noqotay bulshad Muslimka ah ee Christchurch qaarkood, caydu inay ku sii xumaato laga bilaabo 2014kii markii la daabacay sheeko warbaahintu qortay oo ku saabsanayd Islaam xagjir ah oo jooga Christchurch, waxa kaloo la sameeyay eedaymo in cid lagaga dhigay xagjir Masaajid ku yaal Christchurch. Sheekadaa warbaahintu waxay ku lahayd samayn balaadhan oo weli socota bulshada Muslimka ah ee Christchurch, iyadoo ay jireen warbixno sannadii ka dambeeyay sheegaya inay weli socdaan dhacdooyin weli Masaajidka ka socda, sida in lasoo galo, in la dhibo iyo in la jabsado. Hadaynu dib ugu noqono sheekadii warbaahinta ee 2014kii, mid ka mida badbaadeyaashii weerarkii argagixisada ahaa ayaa ka hadlay sida ay in badan ugu foognaayeen arrimaha nabadgelyada iyo ammaanka masjdka laga soo bilaabo maalintaa (2014).

16 Waxa kale oo jiray dareenka ah siday warbaahitu u sawirtay qofkii ku kacay weerarkii argagixisada ahaa 15kii March 2019kii inuu ahaa eexasho. Maqaalo ay warbaahintu qortay ayaa iswaydiiyay sideebuu "wiil wanaagsani" unoqonkaraa "wiil xun"? Qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii waxay dareemeen in haduu ahaanlahaa muslim qofka weerarka argaixisada ah geystay inay warbaahintu qofkaa ka bixinlahaayeen sawir kaa ka duwan, manay dhacadeen inay u muujiyaan inuu ahaa wiil wanaagsan.



# Qaybta 4: Su'aalihii layska weydiiyay qofka iyo waxay hey'adaha Bulshada ka yaqaaneen qofkii gaystay argagixisada

1 Qaar ka mida qoysaska, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha aanu la kulanay ayaa su'aalo naga waydiiyay ama nala wadaagay aragtiyahooda ku saabsan qofkii fuliyay weerarka argagixisada ah. Waxay rumaysanyihiin inuu qofku soo siyaartay Masjid al-Nur iyo Xasrunta Islaamka Linwood weerarka argagixisada ah ka hor15kii March 2019kii. Waxay sharaxeen nin, ay rumaysanyihiin inuu ahaa qofka, oo isagoo isqarinaaya hadal la qabsaday Masjid al-nur, isagoo imaamkuna ku jira, waxaanay sheegeen inuu dhaqankiisa gudaha masaajidka, uu ku jiro wakhtiga salaadda, inaanu ahay mid masjidka joogto u yimaada.

2 Qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii badankoodu way fahmiwaayeen sida qofku u fuliyay diyaargarawga intaa leeg una qorsheeyay hawlaha uu qabtay iyadoon la ogaanin. Waxay rumaysanyihiin inuu gacan ka helay saaxiibo ama kooxo Khadka tooska ah ku xidhan si uu u fuliyo weerarka argagixisada ah. Waxa kale oo ay rumsanyihiin qof in ka badani inay ku luglahaayeen weerarka argagixisada ah qorshaha uu ubaahnaan lahaa darteed, waxaana jira dad sheegay inay maqleen qofka oo cid kale la hadlaaya intuu weerarka argagixisada ah fulinaayay.

3 Qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii nagala hadlay qofka lagu xukumay weerarkii argagixisada ahaa waxay hayeen su'aalo gaara oo ay doonayeen in loogaga jawaabo warbixinta ay diyaariyeen Gudida Boqortooyad oo ay ku jireen:

- Miyuu haystay taageero toos ah ama mid dadban si uu ufuliyo weerarkii argagixisada ahaa?
- Siduu u awooday inuu iibsado hubka iyo qalabka uu ubaahnaa si uu ufuliyo weerarkii argagixisada ahaa?
- Siduu u urursaday hubka sidaa u badan isagoon soo jiidan indhaha maamulka?
- Markaad eegto xaqiiqada ah inuu siyaartay wadamo soo saaray talo looga digay safarka, maxay hey'adda socdaalku si mug leh ugu baadhiwayday markuu soo gelaayay New Zealand?
- Siduu u ogaaday wakhtiga saxda ah (perfect time) uu gelikaro Masjid al-Nur ama Xarunta Islaamka Linwood?

4 Kuwan iyo su'aalo kale ay ka waydiiyeen  Bulshadu qofka iyo waxay hey'adaha Bulshada ka ogaayeen qofka waxaanu kaga jawaabnay warbixintayada.



# Qaybta 5: Xalalka ay soo jeediyeen qoysaska ay saamaysay dhibtu, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha

1 Ujeedada ugu horaysa aanu ka leenahay inaanu la kulano qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha waa inaanu dhegeysano. Waxa noo dheer inaanu la wadaagno khibradooda shakhsiga ah iyo werwerkooda, qaar badan ayaa noosoo gubiyay fikradahoodii ahaa, sida arrimihii ay soo jeediyeen wax looga qabanayo.

2 Waxa lanoo sheegay inay qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii biyo goobjoogeyaashii ubaahnaayeen wakhti ay ku bogsadaan intaanay ka qaybqaadan hawsha, ay ku jiraan Gudida Boqortooyada ee Xogbaadhista iyo (waxa noqonlahaa) maxkamadaynta qofka. Dabeecadda waqtiga ay qaadanayso hawshu darteed, qaar baa lagayaabaa inay ka qaybgalkeeda kariwaayaan, inkastoo tani tahay qayb ka mida awoodsiinta soo kabashadooda shakhsiga ah. Fikrad lanoo soo gubiyay waxay soo jeedisay samaynta hab sharci oo waqti dheer kaydsama oo aan lahayn dhammad. Waxa lala dhisilahaa hawsha qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii si wax looga qabto baahiyahooda socda ee adag. Hawshaasi waxay siinlahayd dhibaneyaasha la xisaabtan, daweyn, fursad ay ku sheegtaan wixii soo maray iyo inay cadeeyaan inaanay dembi lahayn. Hadaanu jirin waqti go'ani, waxay hawshu u suurtogelinaysaa kuwa taageerada ubaahan inay la shaqeeyaan waqti iyaga uhaboon markaana awood usiiya soo kabashadooda.

3 Waxa lanoo sheegay in loo baahan yahay in mayd baadhis la sameeyo si loo keeno qiimayn madax banan oo laga sameeyay jawaabtii weerarkii argagixisada ahaa oo ay ku jirto jawaabtii Booliiska New Zealand iyo cisbataalada iyo in la hubiyo in laga jawaabo su'aalihii taagnaa oo dhan.

4 Waxaanu ka maqalay qoysaska dhitu gaadhay, badbaadayaasha iyo goobjoogeyaasha iyo xubno kamida Kooxda Tixraaca Bulshada Muslimka inay muhiim tahay inay waxwaliba ka daahfurraadaan xagga dawladda iyo hey'adaha Bulshada markay noqoto in bedelaad la samaynaayo iyadoo laga jawaabayo warbixintayada iyo sidaanu u hirgelinay iyo talooyinkii aanu soo jeedinay. Waxa lanoo sheegay inaan loo dayn Bulshada oo keliya in loo haysto dawladda iyo hey'adaha Bulshada in lagala xisaabtamo hubinta in lagu dhaqmay warbixintayada. Tuaalahaan, qaar ka mida qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha ayaa soo jeediyay inuu jiro Wasiir ka mas'uul ah qoysaska dhibtu gaadhay, badaadeyaasha iyo goobjoogeyaashii weerarkii argagixisada ahaa iyo hirgelinta soojeedintii Gudida Boqortooyada, kaasoo u eeg Wasiirka ka mas'uulka ah Dib U Gelidda Pike River, iyo inay dhamman hey'adaha Bulshada ay khusaysaa warbixinta u gudbiyaan Wasiirkaa.

## Masjidka ammaankiisa oo la kordhiyo

5 Dadka qaarbaa soo jeediyay in si jooto ah loo kordhiyo ammaanka Masjid al-Nur iyo Xarunta Islaamka Linwood iyo meelaha kale ay Musilmku isugu yimaadaan. Waxa ka mid ahaa xalalka Amniga ee lasoo jeediyay in la joogteeyo joogitaanka Booliiska New Zealand, in la hubiyo inaanay banaanayn meelaha laga galo masjidka, in lagu xidho "Security Cameras"

(Kamaradaha Ammaanka) talaabooyin ammaanna la qaado. Tan waa inay dawladdu maalgelisaa. Waxa kale oo lanoo soo jeediyay, Masjidkoo keliya maahee, in kor loo qaado ammaanka meelaha caabudaadda oo dhan.

## In la qaato xuquuqda aadamaha, kala duwanaata bulsha iyo yaraynta saamaynta xagjirka dhibaatada leh

6 Kudhawaad cidkasta oo aanu la kulanay waxay rumaysnaayeen inay wax ka qabashada takoorka iyo baqdingeintu ka dhigilahayd New Zealand meel ammaan ah oo ay ka qaybgelayaan ka hortagga waqtiga soo socda weerar argagixiso. Waxay yidhaahdeen in la tirtiro takoorka waxay ku xidhantahay in loo sameeyo wacyigelin Bulshada New Zealand oo dhan.

> *Waa in la gilgilo xididkan nacaybka. Dirsooca waxa la tirtitikaraa iyadoo ay warbaahintu ku jirto. Waa in la gubiyaa wararka nabadgelyada leh.*

7 Dadka qaarbaa soo jeediyay inay New Zealand u lahaato xukumo adag dembiyada nacaybka iyo khudbadaha nacaybka. Dad yar ayaa soo jeediyay in la balaadhyo qeexidda khudbad nacayb sida ku jirta Xeerka Xuquuqda Aadamaha 1993 si loogu daro cadaawadda cadaawadda diintaloogu ku salaysan ee dadka loo geysto.

8 Dadku waxay nala wadaageen fikrado kala duwan oo ku saabsan sida dadka loogu dhigayo waxay yihiin dhaqamada iyo diinaha kala duwani, iyo muhimadda kala duwanaanshahu uleeday bulshada New Zealand. Fikradahaa waxa ku jiray:

- In loo gudbiyo sida dacwad looga gudbiyo dhacdooyinka dirsooca ah;
- Olole ka soo horjeeda dirsooca;
- Ololaha wacyigelinta bulshada ee dhaqamada iyo diimaha kala duwan;
- In la balaadhiyo tababarka macalinka iyo in lagu daro diiwaanka wax barashda iskuulka dhaqamada iyo diinaha kala duwan;
- In loogu yeedho masaajidada New Zealand oo dhan inay martigeliyaan xaflado bulsho;
- Dawladaa hoose oo kafiisha abaabulana xaflado ay isgu yimaadaan dadweynuhu uguna dabaaldegaan xafladaha muslimka u gaarka ah sida Ciidda, sida kuwa kaleba ay ugu dabaaldegaan dhacdooyin dhaqan sida Matariki, Sannadka Cusub ee Shiinaha iyo Diwaali; iyo
- In la casuumo Madaxda Bulshada Muslimka si ay uhogaamiyaan wadahadal bulshadu ka yeelato Islaamka kana hawlgalaan wadahadallo badan oo diimaha dexdooda ka qabsooma.

**Waa in la gilgilo xididkan nacaybka. Dirsooca waa in la tirtitikaraa iyadoo ay warbaahintu ku jirto. Waa in la gudbiyaa wararka nabadgelyada leh.**

## In haruumarin lagu sameeyo Nidaamka Ammaanka Qaranka New Zealand

9 Dadkii aanu la kulanay qaarkood ayaa soo jeediyay in haruumarin lagu sameeyo Nidaamka Ammaanka Qaranka New Zealand. Waxay dareensanaayeen in hey'adaha ammaanka noqdaan qaar intaa ka firfircoon. Gaarahaan, waxay soo jeediyeen inay hey'adaha ammaanka kordhiyaan la socdaan kuwa Muslimka kasoo horjeeda, xagjirka midigta fog raacsan, iyo haanjebaadaha lagu hayo bulshooyinka dagan ay kuhayaan baraha bulshadu, iyo inay u arkaan hanjebaadaha Khadka tooska ah wax weyn.

> *In qalad laga fahmo oo laga baqo ujeedooyinka ruuxiga ah iyo falsafadda diinta Islaamka, in badan ayaa la yiqiinay inay jireen, haba noqdaan bulshooyinka dhaqanka isdhexgalka leh ee nabadda ah kuwaasoo Islaamku ku yaryahay. Qaladaadkaa la fahmay, markay galaan gacmaha caddanka isweyneeya ee xagjirka ah, ayaa sameeyay salka fekradda weerarada. Markaas aad ayay muhiim u tahay qaladkaa la fahmay inaan loo ogolaan inuu uga daro arrimaha caamka ah ee nidaaku xudunta u yahay.*

10 Dadka qaarbaa ku taliyay tababar dheeraada in la siiyo shaqaalha Bulshada Sirdoonka New Zealand guudahaan si loo ogaado hanjebaadda baahaysa markiiba.

11 Waxa lanoo sheegay inay tahay qaybaha hey'adaha Bulshadu inay shaqogeliyaan oo haruumariyaan khibrad haboon, ay ku jirto khibrad dhaqan, si ay isaga celiyaan:

- Babacdhigga ka horyimaadda, baahiyaha kabashada, dadka iyo bulshooyinka urugaysan;
- Babacdhiga daka la shaqeeya dadka urugaysan iyo bulshada ay u dhawdahay inuu ka horyimaado iyo baahida ah in la hubiyo helitaanka turjumaad af iyo qoraal ah;
- Sida dadka ay argagixisadu ku dhacday ay suurtagal ugu tahay inay helaan oo gartaan warka;

  > *Muhiim ayay u tahay hey'adaha taageerada bixiyaa inay fahmaan inay ku adkaankarto dhibanayaasha inay ka shaqaysiiyaan war markay dareensanyihiin inay qulubsanyihiin. Urugadu (trauma) waxay u samaynkartaa ka shaqaysiinta warka dhawr dariiqo.*

- Sida loo dhiso is aaminaad ku salaysan, iskaashi dhaw oo lala yeesho bulsahada dagan;

  > *Aad bay muhiim u tahay inaad si foojigan u dhegeysato, taageerto oo si qumman ula dhaqanto – saddexda lama kala saaro- bulshada waxyeeladu gaadhay si aad u gaadhsiiso adeeg iyo taageero qumman.*

- Ka taageer nafsiahaan baahiyaa kabashada si uu ugu koobnaado qabashada shaqooyinka bulsha.

  *Halkay kala imanlahayd iskayeelyeel ama joogitaan dadban (madax tus), waxaa loogu yeedhayaa booliiska inay noqdaan kuwo u firfircoon oo dhisa isku dhawaansho dhaba una leh daryeel iyo foojignaan bulshada, iyo inay noqdaan qaar u foojigan baahiyaa iyo nabadgelyada bulshada.*

12 Waxa lanoo sheegay muhimmadda in la sameeyo xarun dadka la dhigo si ay u caafimaadaan (siiba, meel ay badbaadeyaashu ku raystaan). Cunsurta muhiimka ah ee arrintani waa in badbaadeyaashii la siiyay fursado iyo saaxad lagu dhegeysto, iyo inay ka qayb qaateen dhisidda xalal waara.

*Muhimadda kowaad waa in la qiimeeyo codadka dhibaneyaasha. Dhibaneyaashu waxay leeyihiin dareen miyir leh iyo weliba fikrado xalal u ah arrimaha ugu mudan, laakiin way la raftaan in laga dhegeysto.*

13 Habka xarun dadka la dhigo, waa laynoo sheegay, waxay ku foognaanayaan inta badan xalilaadda dhibaatooyinka iyo xalilaadda mashaakilka iyo in la helo xalal dhaxalgal ah mustaqbalkana ku foogan. Taa beddelkeedu waa, hab nidaam ku xidhan xarun qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii ay soo mareen ayaa bedelkiisu ahaa mid culayska saaray ka falcelinta khatarta ama dhibaha, halkii ay ahayd baahidu kuwii ay haysay nidaamku inuu taageero.

14 Waxa kaloo lasoo jeediyay, qaybna ka ahaa inuu qorshahoodi diyaar yahay, Hey'adaha Bulshada waxay qorsheeyaan baahiyaa soo kabashada waqtiga dheer ee bulshada, iyo inay qorsheyaashaasi yihiin qaar debecsan oo la aqbalikaro. Tusaale ahaan, sida loo qeexay badbaade inay u baahato inay kaladuwanaato iyadoo ku xidhan dabeecadda dhacdada ay bulshadu kasoo kabanayaan. Sidookale, bulshooyinka kala duwani badanaa qoyska waxay u kala saaraan siyaabo kala duwan markaa tanina waxay u baahantahay in la tixgeliyo.



# Qaybta 6: Arrimo kale oo ay soo qaadeen qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaash, iyo goobjoogeyaasha

1 Habkii aanu qaadanay si aanu ula kulano qosaskii dibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii, gaarahaan iyagoo kulanka hogaaminayay oo nagala hadlay waxay doonayeen, waxay noqotay in lana siiyo dad badan fikradahoodii iyo aragtiyahoodii kuwaas oo ka baxsanaa sida shuruuda aanu wax utixraacno.

2 Sida ku xusan waraaqahan rasmiga ah xagooda hore, shuruudaha aanu wax ku tixraacno ayaa nooga baahan inaanu damaanad siino bulshada New Zealand. Markaa waxay nalatahay in la diiwaan geliyo arrimaha muhiimka u ah qoysaska, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaashii aanu la kulanay.

## Siday uga jawaabeen weerarkii argagixisada ahaa Booliiska New Zealand

3 Dad badan ayaanu ka maqalay jawaabcelintii weerarkii argagixisada ahaa, kuwaas oo ay ku jireen eemooyinkii in si fiican ay u qalabaysnaayeen si ay weerarka argagixisada ah ula dhaqmaan. Kani waxa uu ahaa arrinka keliya ee sida joogtada ah loogaga hadlay dhammaan kulamadii aanu la yeelanay qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii.

4 Dadkii aanu la kulanay waxay ka muujiyeen cadho, murugo,jahowareer iyo werwer waqtiga dheer ee ay ku qaadatay Booliiska New Zealand inay soo gaadhaan gudaha Masjid al-Nur iyo in loo ogolaado inay galaan adeegyadii gargaarka caafimaadkka degdega ah oo ay ka gudbaan Meesha ay xidheen Booliiska New Zealand. Ku dhawaad qof kasta oo aanu la kulanay waxa uu rumaysnaa in la badbaadinlahaa hadii ay helilahaayeen daaweyn caafimaad goor hore.

> *Waxaa jira dareen ah, in kastoo ay xubnaha bulshada shaqo xooga geliyeen inay bixiyaan tilmaamo cad oo kooban si jahawareerka looga hortago, booliisku waxay muujiyeen awood darro weyn inay si fiican oo haboon uga falceliyaan.*

5 Dad kaloo badan aanu arrintan ka maqalay ayaa ka cadhaysnaa sida aanay Booliiska New Zealand dhaqso ugu dhaqaaqin inay badbaadiyaan masaajidka kale iyo meelaha ay bulshada Muslimka ahi isugu yimaadaan. Waxay rumaysnaayeen in Xarunta Linwood nafo badan lagu badbaadin lahaa hadii ay Booliiska New Zealand dhaqso meesha loo geynlahaa. Waxa lanoo sheegay inay qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaashu barbar dhigeen waxay soo mareen dhacdooyin hore oo toogasho ah lana mida tan kana dhacay meelihii ay ka yimaadeen intaanay New Zealand iman, halkaasoo hey'adaha lagu qeexay

> *... aad ayay uga dhaqso badantahiin uguna foojiganyihiin markay xaaladu degdeg tahay.*

6 Waxa lanoo sheegay kulamkii ahaa 8 November 2020 ee aanu la yeelanay qoysaskii, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii dhibtu gaadhay inay weli su'aalo aan laga jaawbin u hayaan siday Booliiska New Zealand iyo Cisbitaaladu uga jawaabceliyeen weerarkii argagixisada ahaa.

7 Qaar badan oo ka mida qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii ayaa ku taliyay inuu Taliyihii Booliiska ee hore, Mike Bush, ku dhawaaqay dib u eegis madax banan siday Booliiska New Zealand uga falceliyeen weerarkii argagixisada ahaa. Qaar badan oo ka mida qoysaskii dhibtu dhacday, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha ayaa dareensanaa jahawareer inaan natiijadii dib u eegista la shaacin waxaanay ahayd in la shaaciyo. Qaar ka mida qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii ayaa dareemay inay aaminaadii iyo kalsoonidii ay Booliiska New Zealand u hayeen yaraatay taa darteed. Qaar ka mida qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii ayaa ka shakiyay inay dib u eegistii kashiftay dhawr khalad oo aanay Booliiska New Zealand doonayn inay soo baxaan.

## Dhexgakii 'Qofka' ee Nidaamka Caddaaladda Dembiyada

8 Dadka qaar aanu dhegeysanay ayaa ka werwersanaa inaanay xaaladaha xabsiga New Zealand ku adkayn qofka. Dad yar ayaa soo jeediyay inuu dilku noqonlahaa ciqaabta ku haboon cidkasta oo ku kacda weerar argagixiso.


9 Dad yar ayaa nala wadaagay werwer jahawareer inuu qofku karay inuu u diro xidhiidh kuwo la maskax ah intuu xabsiga ku jiray. Waxay iswaydiiyeen sida arrintaa loo ogolaaday inay dhacdo taasi waxaanay warsadeen Waaxda Sixidda (Department of Corrections) cidda ka mas'uul ah. Waanu maqalay baahida loo qabo in laga joojiyo xagjirka xidhan inay faafiyaan aragtiyo waxyeelo leh.

# Lifaaq: Shaqda loo diyaaryay warqadan rasmiga ah (document)

1 Waxaanu helay qader waxku oola oo xog ah intii aanu ku foognayn hawsha qoysaska dhibtu gaadhay, badbaadeyaasha iyo goobjoogeyaasha, anagoo adeegsanay kulamo, gunaanadyo iyo dexgallo. Kulamo aanu la yeelanay qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii, iyo goobjoogeyaashii waxa loo qabtay si qarsoodi ah, laakiin Gudida Boqortooyada way qorteen, iyagoo ogolaansho ka qaatay kuwii ay la kulmeen, si aanu u kaydino wixii aanu maqalay.

2 Waxaanu isugaynay qoraaladii iyo xogihii kala duwanaa ee aanu ka helay qoysaskii dhibtu gaadhay, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii, si aanu u suuradino muuqaalada iyo mowduucyada iskumidka ah. Tan ayaa noo suurtogelisay inaanu halkan ku kaydino (to document) sheekooyinkoodii, khibradoodii iyo cadayntoodii guudahaan, halkii aanu uga sheegilahayn sideeda khibradaha dad gaara, anagoo ixtiraamayna dabeecadda gaarka ah uu lahaa dexgakaanu iyaga la yeelanay. Meelihii aanu gelinay wixii la yidhi, iyadaanu waydiisanay waanaanu hellay ogolaanshahooda.

3 Warqaddan rasmiga ahi (document) ma gaadhayso wax go’aan ah, ama kama hadlayso, sheekooyinkii, khibradihii iyo caddamihii kuwii uu aad u saameeyay weerarkii argagixisada ahaa. Kamana doorbidayso hal aragti mid kale. Halka ujeedada document-kan ay tahay inay siiso mawqif daacad ah qoysaskii 51kii shahiid, badbaadeyaashii iyo goobjoogeyaashii weerarkii argagixisada ahaa iyo qoysaskoodii. Codadkani in la maqlo ayay u qalmaan.



**Calaamadayada waxaa dhiiri geliyay adkaysiga iyo Aotearoa-ha aan dhamaanayn ee New Zealand Astaanteeda, “the koru.”**

Caleenta Fernka ee aan furfumayni waxay Metelaysaa nabad, xasiloonaan, kobcid, isbedel togan Iyo baraarujin. Cabirka nabadda wuxu ku ahaa soojireen Macnaha diinta Islaamka ee nool.Waxaanu is barbardhignaa taoga-dan iyo geediga Horyaala reer New Zealand si ay unoqdaan meel Ammaan ah iyo Bulsho isku dhexnoolaata.Naqshadda koruoo ay la socdaan todoba kooxood Oo todoba caleemood oo la furfuray waxa kale oo ay Garawsanyihiin inay 15kii March 2019kii inay ahayd, Sida ay qaboto taariikhda dayxa laga tiriyo ee Islaamka 7dii Rajab 1440kii, taasoo ah maalinta 7aad ee bisha 7aad Ee Islaamka.